



Diyaarinta Maxkamadda Dacwadda Qaxootiga

Buughagaha Dadka Qaxootinimo U Dacwoonaya

Edmonton, Alberta

Somali

Wixii dib u cusboonaysiin lagu sameeyo Buughagahaan fadlan booqo:
www.kinbrace.ca/rhp-guide/updates

Tusmada Buughagaha

<i>Dacwadda Magangalyo Qaxootinimo</i>	2–15
Magangalyada Qaxootiga Oo Kooban	2
Dhacdooyinka Cayiman iyo Taariikhaha Muhiimka ah	5
Qabsashada Qareen Sharci	8
Buuxinta Foomka Xogta Dacwaddaada (Basis of Claim Form)	10
Gudbinta Foomka Xogta Dacwaddaada	13
<i>Isu Diyaarinta Maxkamadda Dacwaddaada</i>	16–31
Uruurinta Caddaymaha: Dulmar Kooban	16
Uruurinta Caddaymaha: Qeexidda Erayada / Weeraha Sharciga	19
Uruurinta Caddaymaha: Qodobbada Sharciga	22
Gudbinta Caddaymahaaga	28
Dhawrida Caafimaadkaaga Intaad Isu Diyaarinaysid Maxkamadda Dacwaddaada	30
<i>Maalinta Maxkamadda Dacwaddaada</i>	32–37
Maalinta Maxkamadda Dacwaddaada	32
Liiska Qodobbada Diyaarinta Maxkamadda Dacwadda	36
<i>Maxkamadda Dacwaddaada Ka Dib</i>	38–39
<i>Qeexidda Ereyada / Weeraha Sharciga</i>	40–41
<i>Hay'adaha Dawladda</i>	42–43
<i>Macluumaad / Ilo Wareedyo (Resources)</i>	44

Kanada waxay ku siinaysaa magangalyo qaxootinimo haddii sababaha ad waddankaagii uga soo carartay ay buuxiyaan shuruudaha sharciga qaxootiga Kanada.

Buughagahaanu wuxuu kaa caawinayaa in ad fahamtid:

- Sidaad u bilaabaysid dacwadda magangalyada qaxootinimo
- Qeexidda Ereyada / weerah sharciga ee magangalinta qaxootiga
- Waqtiyada kama dambaystaa ee u diyaargarowga maxkamadda dacwaddaada
- Nooca caddaymaha lagaa rabo inaad u gudbisid hay'adda socdaalka iyo qaxootiga
- Sida ad ugu diyaargarobaysid maxkamadda dacwaddaada
- Meesha laga helo macluumaadka muhiimkaa ee u diyaargarowga maxkamadda dacwadda
- Maxaa dhacaya maalinta maxkamadda dacwaddaada

Tallaabooyinka ugu horreeya ee muhiimkaa:



Hadda raadso caawimaad sharci!

Dadaal walba u gal sidii ad ku heli lahayd qareen

wanaagsan oo kaa caawiya dacwaddaada qaxootinimo. Haddii aadan qareen iska bixin Karin codso caawimaad sharci. Haddii dakhligaau yar yahay oo adan qareen iska bixin karin, hadda wac ama booqo xafiiska si ad u codsatid Caawimaadda Sharciga Alberta (eeg bogga 9)!



Hadda bilow inaad is diyaarisid!

Bilow inaad isu keentid qoraalo iyo caddaymo

si ad u caddaysid in dacwaddaadu run tahay iyo in ad dhab ahaantii u baahan tahay magangalinta Kanada. Dhammaan caddaymaha iyo aqoonsiyadaada u tarjum Af Ingiriis ama Faransiis sida ugu dhakhso badan.

Ereyada la soo gaabiyey ee ku jira Buughagahaan

BOC: Basis of Claim (Xogta Dacwadda Qaxootinimo)

CBSA: Canada Border Services Agency (Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada)

CIC: Citizenship and Immigration Canada (Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada)

DCO: Designated Country of Origin (Waddan Ku Jira Liiska Waddamada Ammaankaa)

DFN: Designated Foreign Nationals (Waddaniyiin Shisheeye An Caadi Ahayn)

IRB-RAD: Immigration and Refugee Board of Canada – Refugee Appeal Division (Hay'adda Socdaalka iyo

Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga)

IRB-RPD: Immigration and Refugee Board of Canada – Refugee Protection Division (Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga)

LAA: Legal Aid Alberta (Caawimaadda Sharciga Alberta)

NDP: National Documentation Package (Qoraalada Warbixinada Waddamada)

UNHCR: United Nations High Commissioner for Refugees (Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay)

Magangalyada Qaxootiga Oo Kooban



Waxaa dhici karta inaad ka soo badbaaday dhacdo baqdin leh ama kula kulantay caddaalad darro xun waddankii ad ka timid. Ama inaad ka baqaysid inaad ku laabato waddankaagii ammaan darro awgeed ama ay adagtahay inaad shaqo ka heshid. Xaqiiqooyinkaanu lama macna aha inaad isla markiiba toos ugu qalmaysid magangalin qaxootinimo.

Si aad u heshid magangalyo qaxootinimo, waxaa kugu waajib ah inaad caddaysid inaad buuxisid shuruudaha sharciga ku qeexan ee loo aqoonsan yahay qofka qaxootiga caadiga ah (Convention Refugee) ama qof magangalyo u baahan (Person in Need of Protection). Qaybaha dambe ee Buughagahaan ayaad in badan ku sii ogaan doontaa macnayaasha sharcigaa ee ereyada. Waxaa kaloo kugu waajib ah inaad caddaysid inaad run sheegaysid. Taa waxaad ku samayn kartaa adoo soo uruuriya caddaymihii iyo adoo si cad oo faahfaahsan uga warbixiya wixii kugu dhacay.

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) waxay go'aaminaysaa inaad u qalantid magangalyo qaxootinimo.

! Kanada markaad weydiisatid (codsatid) magangalyo qaxootinimo, waxaad ku dacwoonaysaa inaad tahay qaxooti. Si ad ugu guulaysatid dacwaddaada qaxootinimo, waa inaad caddaysaa inaad tahay sida caalamku ku heshiiyey Qaxootiga Caadiga ah (Convention Refugee) ama ah Qof u Baahan Magangalyo (Person in Need of Protection). Macnayaasha sharcigaa ee ereyadaan waxaa laga heleyaa qaybaha 96 iyo 97 ee Xeerka Socdaalka iyo Magangalyada Qaxootiga Kanada (eeg *bogogga 20–21 ee Buughagahaan*).

Waxaad fursad u heleysaa in maxkamadi dhagaysato dacwaddaada qaxootinimo halkaas oo codsigaaga magangalyo lagu go'aamin doono. Dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo sida ay u badan tahay wuxuu dhici doonaa 1 ilaa 2 bilood ka dib markii ad gudbisay dacwaddaada qaxootinimo. Maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo, garsooraha go'aanka gaaraya ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), laguna magacaabo Xubinta Guddoonka, wuxuu tixgalin doonaa caddaymahaaga afkaa, caddaymaha markhaati-gaaga, dacwaddii ad ku qortay Foomka Xogta Dacwadda (Basis of Claim Form), iyo wixii kaloo caddaymo ad gudbisay si uu go'aan uga gaaro inaad u qalantid magangalyo qaxootinimo.

*** Xusuusnow:** Dacwooyinka qaarkood, waxaa dhici karta in Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada kugu wargaliso in dacwaddaada "la dadajinayo." Markaasoo kale, ma maraysid maxkamad dhagaysi dacwad caadi ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka dacwadda la dadajiyey, fadlan eeg bogga 41.

Qoraalada caddaymaha laga tixgalin doono maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada waxaa ka mid ah:

- Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo
- Dhammaan foomamka codsiyada Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (Citizenship and Immigration Canada application forms)
- Wixii kaloo qoraallo ad u gudbisay caddaymo ahaan
- Warqadaha (qoraalada) rasmiga ah ee Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) iyo Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada (CBSA)
- Qoraalada Warbixinada Waddamada (NDP) ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) (eeg *bogga 18*)
- Codsigii fiisaha (VISA) ad saxiixday intii an lagu siin fiisaha Kanada, haddii ad fiisa codsatay
- Baasaboorkaaga iyo shaabbadaha ku dhufsan oo muujinaya dalalka caalamka ad soo martay, haddii ad baasaboorka leedahay

Saddex arrimood oo muhiim ah inaad ka ogaatid nidaamka magangalyada qaxootiga Kanada:

1 **Nadaamka magangalyada qaxootiga Kanada waa mid dheereeya oo leh dhacdooyin waqti cayiman oo kooban.**

Isticmaal buughagahaan si uu kaaga caawiyo fahamka nadaamka magangalinta qaxootiga iyo inaad ka soo baxdid ballamaha muhiimka ah.

2 **Saddex hay'adood oo dawladda ayaa ku lug leh nadaamka dacwadda magangalyada qaxootiga.**

Hay'ad kastaana waxay ka qaadataa kaalin gaar ah habsocodka dacwadda qaxootinimo waxayna leedahay cinwaano iyo telefoono gaar ah oo lagala xiriiro. Haddii ad baddashid cinwaanakaaga ama nambarka telefoonkaaga waa inaad hay'ad kasta gooni ula xiriirtaa siisana xogtaada cusub.*



IRB-RPD:

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga



CIC:

Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada



CBSA:

Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada

3 **Haddii ad ka timid Waddan Ku Jira Liiska Waddamada Ammaankaa (DCO), waxaa jira xeerar gaar ah iyo jadwalka dhacdooyinka oo dheereeya oo khuseeya dacwaddaada.**

Muhiim bay kuu tahay inaad markiiba ogaatid in waddanka ad ka timid uu Dawladda Kanada ugu jiro liiska waddamada ammaankaa (DCO). Booqo bogga internetka www.cic.gc.ca (raadi "dco") si ad u aragto liiskii waddamada ee ugu dambeeyey.


Waxaad kaloo weydiin kartaa sarkaalka Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada (CBSA) u shaqeeya in ad ka timid waddan ku jira liiska waddamada ammaankaa (DCO).

Ka eeg bogga 40 macnaha waddan ku jira liiska waddamada ammaankaa (DCO).



Ka eeg bogga 43 cinwaanada iyo faahfaahin deeri ah.

Jadwalka Dhacdooyinka iyo Taariikhaha Muhiimka ah



Jadwalka dhacdooyinka dacwaddaada magangalyada qaxootinimo wuxuu ku xiran yahay meesha ad iska dhiibtay iyo haddii ad ka timid waddan ku jira liiska waddamada ammaankaa (DCO) iyo in kale.

Labada bog ee soo socda, si fiican u fiiri labada jadwal ee dhacdooyinka. Dooro jadwalka dhacdooyinka ku khuseeya. Meeshii ad ku aragtid santuukh bannaana, ku qor taariikhahaaga muhiimka ah.



Waxaan iska dhiibay garoon diyaaradeed, ama xudduudda dhulka la isaga gudbo

Maalinta
0

- Dhamaystir waraysigaaga qiimaynta inaad u qalantid tixgalin qaxootinimo.
- Qaado Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC).
- Qaado taariikhda ay dhacayso dacwaddaada qaxootinimo.

Maalinta
10

Maalinta ugu dambaysa in ad u geysid halka ay kaala soo xiriirayaan Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada (CBSA) iyo Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Waxaana ka mid ah: cinwaan, nambar telefoon, nambar fakis (haddii ad leedahay) iyo cinwaan iimeyl (email address, haddii ad leedahay).

Maalinta
15

Maalinta ugu dambaysa in ad ugu gudbisid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC) Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)



Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC) maalinta ugu dambaysa inaan gudbiyo:

10 Maalmood
ka hor
dhagaysiga
dacwaddayda

Maalinta ugu dambaysa in ad ugu gudbisid liiska markhaatiyaashaada iyo dhammaan caddaymahaaga Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)



Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC) maalinta ugu dambaysa inaan gudbiyo:

Maalinta
45
(qiyaastii)

Maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo (haddii ad ka timid waddan ammaana (DCO)



Taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda

Ama

Maalinta
60
(qiyaastii)

Maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo (haddii aadan ka imaan waddan ammaana DCO)



Taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda



Haddii ad joogtid Kanada

gudeheeda, (oo an ahayn xudduudaha laga soo galo) oo lagu xiro ka hor intaadan qaxootinimo ku dacwoon, waa inaad ku buuxisaa maalin ama wax la mid ah gudeheed markii lagu xiray dhammaan foomamkaaga oo dhan. Taasi waxay adkaynaysaa inaad heshid qareen kaa caawiya buuxinta foomamka. Hay'adda Adeegyada Xudduudaha Kanada (CBSA) waxay ku siinaysaa foomamka iyo turjumaan.

Ha gafin ballanta maalinta ugu dambaysa ee Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC) ama maxkamadda dacwaddaada!

Haddii ad gaftid ballanta, waxaad tagaysaa maxkamad khaas ah ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) halkaasoo ay dhici karto in dacwaddaada lagu go'aamiyo mid laga tanaasulay. Haddii dacwaddaada lagu go'aamiyo mid laga tanaasulay, waxay u badan tahay in waddankaagii lagugu celiyo, kuumana suurtoobi doonto in ad Kanada mar kale u dacwooto qaxootinimo. Marmarka qaarkood, dadka qaxootinimada u dacwoonayaa way ku qancin karaan Qaybta Magangalyada Qaxootiga (RPD) in dacwadda dib loo furo, haseyeeshee arrintaasu aad bay u adagtahay in la sameeyo. **[Xusuusnow: Taariikhaha "maxkamadda khaaska ahi" (special hearing) waxay ku qoran yihiin "Ogeysiiska Ballanta Maxkamadda Dacwadda" (Notice to Appear for a Hearing), waa isla warqadda ay ku qoran tahay taariikhda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo. Labada taariikhood ha isku khaldin.]**



Waxaan iska dhiibay (ama iska dhiibi doonaa) xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada (CIC) ee gudaha Kanada.*

Inta aadan aadin xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC):

- Kala soo bax foomamkaaga codsiga www.cic.gc.ca [raadi "qaxootinimo u dacwood (make refugee claim)".]
- Waxaa lagaa rabaa in aad buuxisid 5 iyo 7 foom inta u dhexaysa, taas oo ku xiran haddii ad leedahay qareen iyo inta xubnaha qoyskaagu ka kooban yahay. Xubin kasta oo qoyskaaga ah waa in aad u buuxisid Foomka Xogta Dacwadda Qaxootinimo (BOC Form) iyo foomamka codsiga Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC application forms).
- Waxaad tagtaa xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC) (Isniin ilaa Jimce, waxaana wanaagsan tobanka subaxnimo ka hor 10:00 am) si ad u dhiibtid foomamkaaga oo dhan, laguuna siiyo taariikhda Waraysigaaga U Qalmidda qaxootinimo.

Xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada(CIC) Edmonton: Canada Place
9700 Jasper Avenue, Suite 240, Edmonton, AB
Saacadaha: Isniin ilaa Jimce, 8:00 am – 4:00 pm

Liiska xafiisyada Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada ee Alberta, qabtana dacwooyinka qaxootiga fadlan booqo: www.cic.gc.ca/english/information/offices/help.asp



Muhiim:
Haddii aadan wali bilaabin

dacwaddaada qaxootinimo, hadda la xiriir Caawimaadda Sharciga Alberta (Legal Aid Alberta) si ad u ogaatid in ad qareen xaq u leedahay!

Qareen wuxuu kaa caawin karaa:

- In ad isu diyaarisid Waraysigaaga U Qalmidda Qaxootinimo
- In ad buuxisid foomamkaaga
- In ad bilowdid isu diyaarinta maxkamadda dacwaddaada qaxootinimo

Maalinta 0

- Dhammaystir Waraysigaaga U Qalmidda qaxootinimo. [Waxaad Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC) u dhiibi doontaa Foomamkaaga Dacwadda Qaxootinimo iyo Codsiga Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC) ka hor waraysigaaga u qalmidda qaxootinimo].
- Haddii lagu arko in ad u qalantid in ad u dacwootid qaxootinimo, waxaa lagu siin doonaa taariikhda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo.

Maalinta ugu dambaysa in ad ugu soo gudbisid liiska markhaatiyaashaada iyo dhammaan qoraaladaada rasmiga ah Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD).

Maalinta ugu dambaysa qoraaladayda rasmiga ah:



Maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo [haddii ad ka timid waddan ammaana (DCO)]

Taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda:



Maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo [haddii aadan ka imaan waddan ammaana (DCO)]

Taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda:



10 Maalmood ka hor dhagaysiga dacwaddayda

Maalinta 30 (qiyaastii)

Ama

Maalinta 60 (qiyaastii)

Haddii maalinta ugu dambaysa in ad ku gudbisid Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC) ay noqoto Sabti, Axad, ama maalin fasax ah, waxay isu baddalaysaa maalinta shaqo ee ku soo xigta. Tusaale ahaan, haddii Sabti, Mey 7deedu ay noqoto 10 maalmood ka hor maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada, maalinta ugu dambaysa in ad ku gudbisid dacwaddaada waxay noqonaysaa Isniin, Mey 9keeda.

Waxaa dhici karta in dhagaysiga dacwaddaada dib loo dhigo haddii Hay'adda Adeegyada Xuudduuda Kanada (CBSA) ay dhamaystiri kari waydo baaritaankaaga sugidda amniga inta ka horreysa taariikhda dhagaysiga dacwaddaada.

Qabsashada Qareen Sharci



Waa ra'yi (fikrad) aad u wanaagsan in ad leedahay qareen. Qeexidda ereyada sharciga qaxootigu waa adag yihiin, soo uruurinta caddaymo wanaagsanina waa dhib badan tahay.

Qareenadu waxay kaala talin karaan macnaha ereyada sharciga ee "Qofka Qaxootiga Caadiga ah (Convention Refugee)" ama "Qof U Baahan Magangalyo (Person In Need of Protection)" iyo qaybaha macnaha ereyada adiga ku khuseeya. Waxay kaa caawin karaan in ad fahamtid qaybaha wixii dhib ku soo maray ku habboon muhiimna ay tahay in lagu daro ama qoro Foomkaaga Xogta Dacwadda Qaxootinimo (BOC Form). Waxay kaala talin karaan caddaymaha lagaa rabo in ad keentid si loogu xoojiyo dacwaddaada. Qareenku waxuu kaloo kaaga doodi karaa maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada.

Isku day in ad heshid qareen inta aadan gudbin dacwaddaada magangalyo qaxootinimo. Haddii ad mar hore gudbisay dacwaddaadii, qareena adan haysan, aad ugu dadaal in ad qareen heshid. Xaqiiji in qareenkaaga la heli karo taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada.

Sida ugu dhakhsa badan ula xiriir Caawimaadda Sharciga Alberta (LAA) codsana caawimaad sharci. Haddii adan xaq u lahayn caawimaad sharci, waxaa suurtagal ah in lagu diro hay'ada kaloo dhanka sharciga kaa caawin kara.

Waxaad kaloo qabsan kartaa qareen ama la taliye arrimaha socdaalka. Haddii ad qareen qabsatid, iska hubi in qareenkaasu xubin sharciya ka yahay Ururka Qareenada Alberta. Waxaad ka hubin kartaa bogga internetka Ururka Qareenada: www.lawsociety.ab.ca/extra/lawyer_directory.aspx ama Ururka Qareenada ka wac: 1-800-661-9003. Haddii ad qabsatid la taliye arrimaha socdaalka, iska hubi in la taliyahaasu xubin sharciya ka yahay "Ururka Sharci Ilaalinta La Taliyayaasha Socdaalka Kanada" ("The Immigration Consultants of Canada Regulatory Council") (saad u heshid liiska xubnaha sharcigaa, booq bogga internetka: www.icrc-crcic.ca).

Haddii ad weydid qareen ku caawiya, waa in ad buuxsatid Foomka Xogta Dacwaddaada adiguna isu doodid maxkamadda dacwaddaada. Waxaad kaloo heli kartaa qof ad ku kalsoon tahay oo bilaash kugu caawiya. Hay'ad dib u dajin (eeg bogga 44) baa ayana kuu diri karta meela kaloo beeshaada ah.

Caawimaadda Sharciga Alberta (Legal Aid Alberta)

Revillon Building
300, 10320 – 102 Avenue
Edmonton, AB T5J 4A1
1-866-845-3425

www.legalaid.ab.ca

Waxay qaxootiga xaq u leh siisaa macluumaad sharci, la talin iyo qareemid.

Xarunta Sharciga Beesha Edmonton (Edmonton Community Legal Centre)

200, 10115 – 100A Street
Edmonton, AB T5J 0C8
780-702-1725

www.eclc.ca

Waxay qaxootiga u qalma siisaa macluumaad sharci iyo la talin.




Wali qareen ma haysto, umana diyaarsani maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda. Dib ma u dhigi karaa taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda?

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) waxay kaa filaysaa in ad isu soo diyaarisid maxkamadda dacwaddaada taariikhda loo qorsheeyey. Haddii ay jiraan xaalado an caadi ahayn oo keenaya baahida in ad baddashid taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada, waxaad warqad ad ku weydiisanayso in maxkamadda dib laguugu dhigo u qori kartaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Haddii adan jawaabtii codsigaaga helin ka hor taariikhda maxkamadda, waa inaad tagtaa maxkamadda haddii kale waxaa loo qaadanayaa in ad ka noqotay dacwaddaadii (eeg bogga 40). Haddii ad qareen heshid ka dib markii lagu siiyo taariikhda maxkamadda dacwaddaada, iska hubi in qareenku imaan karo taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada.



Xusuusnow, waxaanu inuu yahay dacwaddaadii magangalyada qaxootinimo. Haddii ad ka maqnaatid waqtigii lagu qabtay ee kama dambaysta ahaa, dacwaddaada waxaa lagu go'aamin karaa mid laga tanaasulay (dacwad laga noqday). Xataa haddii ad qareen leedahay, waa inaad si firfircoon uga qaybqaadataa diyaarinta qoraalada rasmiga ah, uruurinta caddaymaha iyo markhaatiyada, iyo isu diyaarinta waraysiga maxkamadda.

Buuxinta Foomka Xogta Dacwaddaada (Basis of Claim Form)



Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) waa qoraalka rasmiga ah ee ugu muhiimsan ee dacwaddaada qaxootinimo. Foomka Dacwaddaada Qaxootinimo, waxaad si faahfaahsan ugu caddaynaysaa qofka ad tahay iyo sababaha ad u doonaysid magangalyada Kanada. Xubin ka mid ah Wasaaradda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ayaa eegi doonta macluumaadka ama xogta ku qoran foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), markhaati furkaagii iyo caddeymo kale si ay go'aan uga gaarto in ad tahay "Qof Qaxooti Caadi ah" (Convention Refugee) ama ad tahay "Qof Magangalyo U Baahan" (Person in Need of Protection). Maxkamadda dacwaddaada qaxootinimo waxaa su'aalo lagaa weydiin doonaa xogta ku qoran Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form).


Isku day in ad heshid qareen kaa caawiya buuxinta Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) iyo foomamka kale. Haddii aysan suurtagal ahayn, isku day in ad heshid qareen kaala taliya macluumaadka loo baahan yahay inta adan bilaabin (eeg bogga 9). Inta adan buuxin foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form), waxaa muhiim ah in ad fahamtid qodobada sharciga uu tixgalin doono Xubinta Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD).

Xogta (macluumaadka) ad ku qortid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) waa inay noqotaa **sida ugu saxsan uguna**

dhamaystiran ee suurtagalkaa. Haddii xog ku qoran qoraalo kaloo rasmiya – sida codsigaagii fiisaha (visa application) – ay ahayd khalad, arrintaas kala hadal qareenkaaga xogta saxda ahna ku qor Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form). Jawaabna ha iska qiyaasin (malaynin). Haddii adan su'aal jawaabteeda aqoon, sheeg in adan aqoon. Runta sheeg. Haddii adan fahmin su'aal, macnaheeda weydii qareen ama qof shaqaalaha dajinta ah. Dacwaddaada qaxootinimo waa la diidi karaa haddii ad bixisid xog been ah ama marin habaabin ah ama ad qarisid xog muhiim ah.

Marka ad buuxinaysid foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC), xusuusnow in ad:

- Akhridid qaybaha buughagahaan lagu magacaabo “Qeexidda Ereyada Sharciga ah” (Legal Definitions) iyo “Arrimaha Sharciga” (Legal Issues). Qaybahaasu waxay kaa caawimayaan in ad fahamtid sida loo buuxinayo Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) (eeg bogogga 19–27).
- Af Ingiriis ama Faransiis ku buuxi Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form). Haddii ay kugu adag yihiin in ad wax ku qorto luqadahaas, la xiriir hay'ad caawisa dadka qaxootinimada u dacwoonaya (eeg bogga 44). Si ad internetka ugala soo baxdid Foomka Xogta Dacwadda Qaxootinimo (BOC Form) booqo: www.irb-cisr.gc.ca oo raadi “Foomka Xogta Dacwadda”.
- Ka jawaab su'aalaha oo dhan. Meel bannaana ha ka tagin. Haddii adan aqoon su'aal jawaabteed, ku qor “MA AQAAN”.
- Ku qor “n/a” (“ima khusayso”) haddii su'aali aysan ku khusayn.
- Faham su'aal kasta inta adan ka jawaabin.
- Jawaabahaaga si qurxoon u qor ama foomka kombiyuutar ku buuxi.
- Su'aalaha si ad jawaab buuxda uga bixisid, haddii ay kugu filnaan weydo foomka meelaha ka bannaani, waxaad isticmaashaa warqada cadcad oo dheeraad ah.
- **Haddii ad xabsi ku jirtid, foomka ku qor in ad xiran tahay**, oo duruufaha xabsigu ay kugu adkeeyeen in ad foomka buuxisid. Hadalkaas ku qor bogga ugu dambeeya ee Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) , booska saxiixaaga agtiisa.
- Haddii adan hubin taariikhaha ama macluumaad kale qaarkood, waa inaad irrintaas ku sheegtid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form). Waxaad sheegtaa taariikhda saxda ah oo kaliya haddii ad hubtid.
- Dib u eeg Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) inuu saxsan yahay, barbar dhigna foomamkaaga kale ee Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC) si ad u hubisid in xogta ad ku qortay foomamkaaga oo dhan isku mid tahay saxna tahay.
- Haddii uu turjumaan ku caawiyey, weydiiso in turjumaankaagu luqaddaada dib kuugu akhriyo Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form).
- Weydiiso turjumaanka in uu saxiixo Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) bogga 10.



- Marka ad habsatid in xogta ad foomka ku qortay saxsan tahay, saxiix caddaynta bogga 10 ee Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form). Haddii adan haysan waqti kugu filan oo ad ku bixisid xog badan ama si taxadar leh dib ugu eegtid Foomka Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) inta adan saxiixin, arrintaas ku qor Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form).
- Xubin kasta oo qoyskaaga ah, una dacwoonaysa in Kanada siiso magangalyo qaxootinimo, u buuxi Foomka Dacwadda Qaxootinimo oo gooni ah.

Haddii adan haysan caawimaad dhanka sharciga:

- Haddii ay suurtagal tahay, lacagtaada ku qabso qareen ku shaqeeya sharciga qaxootiga oo dib kuugu eega foomka dacwadda.
- Dib u eeg Buughagaha Dadka Qaxootinimada U Dacwoonaya (Claimant’s Guide) ku jira bogga internetka Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB) wixii xog iyo tilmaan bixin dheeraad ah [booqo www.irb-cisr.gc.ca waxaadna raadisaa “Buughagaha Dadka Qaxootinimada U Dacwoonaya” (“Claimant’s Guide”).]

Foomamka kalee codsiga:

Ka sokow Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), waxaa kaloo lagaa rabaa in ad buuxisid foomamka soo socda ee Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC):

- Liiska Hubinta Qoraalada Rasmiga ah (Document Checklist)
- Foomka Codsiga Guud ee Kanada (Generic Application Form for Canada)
- Ku-tiirsaneyaasha Kale / Caddayn (Additional Dependants / Declaration)
- Lifaaq A – Taariikh Nololeed / Caddayn (Schedule A – Background / Declaration)
- Lifaaq 12 – Xog Dheeri ah – Dadka Qaxootinimo U Dacwoonaya Kanada Gudaheeda (Schedule 12 – Additional Information – Refugee Claimants Inside Canada)
- Adeegsiga Qareen (haddii ad qareen ama la taliye socdaal leedahay) [Use of a Representative (if you have a lawyer or immigration consultant)]

Haddii ad dacwaddaada qaxootinimo ka bilowday garoon dayuuradeed, ama xuudduud dhulka la isaga gudbo, mar horaad buuxisay oo gudbisay foomamkaan codsiga intii ad la joogtay Hay’adda Adeegyada Xuudduuda Kanada (CBSA).

Haddii ad dacwadda qaxootinimo ka bilaabaysid Kanada gudaheeda xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC), waa inaad isku mar u dhiibtid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) iyo foomamka Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC Forms). Ballanta waraysiga u qalmidda qaxootinimo kuuma qaban doonaan ilaa ay helaan foomamka dhammaantood. Ka raadso foomamka iyo tilmaan bixinta sida loo buuxiyo bogga internetka www.cic.gc.ca [raadi “xirmada codsiyaasha qaxootiga” (“refugee application package”).]




Carruurtaada mid kasta miyaan u baahnahay in an u buuxiyo, gudbiyana Foomka Xogta Dacwadda Qaxootinimo (BOC Form)?

Carruurta 6 sano jirta ama ka yar oo waalidka kula dacwoonaya magangalyo qoxootinimo, waa in ay buuxiyaan qaybaha 1a – 1g ee bogga 2 oo kaliya.

Foomka waa inuu saxiixo waalidka carruurta ama qareen matala (eeg bogga 40). Carruurta 7 ilaa 17 sano jirta oo waalidka kula dacwoonaya magangalyo qaxootinimo, waa in ay buuxiyaan Foomka Xogta Dacwadda Qaxootinimo (BOC Form) oo dhan. Foomka Xogta Dacwadda Qaxootinimo waa inuu saxiixo waalidka carruurta ama qareen matala.

Gudbinta Foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form)



Inta adan gudbin si taxadar leh qareenkaagu dib ha kuula eego Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form). Hubso inuu wada buuxo saxna yahay, fahamsan tahayna waxa ku qoran. Haddii ad kaligaa buuxinaysid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), weydiiso qareen ama rugta la talinta sharciga ama qof ad ku kalsoon tahay in uu dib u eego foomka si ad u hubsatid in uu saxsan yahay kuna jiraan dhammaan xogihii muhiimka ahaa.


- Hubso in ad nuqul (koobi) kala harto Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), iyo dhammaan qoraalada rasmiga ah ama foomamka kale oo ad gudbisid.

Qaabka, goorta iyo halka ad u gudbinaysid Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) waxay ku xiran tahay halka ad ka bilowday dacwaddaada qaxootinimo.


A. Haddii ad dacwaddaada ka bilowday garoon diyaaradeed, xudduuda dhulka, ama dakad:

Waxaad haysataa 15 maalmood laga bilaabo maalinta lagu siiyo Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) in ad ugu gudbisid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Haddii maalinta kuugu dambaysaa ay noqoto sabti, axad, ama maalin fasaxa, waxay noqonaysaa maalinta shaqo ee ku xigta. Jadwalkaaga ka fiiri bogga 6.

1  Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) asalka ah oo ad buuxisay laba nuqul ka sameyso.

2  Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) ee asalka ah iyo hal nuqul ugu dir Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) boostada deg degga ah (courier). **Ha ku dirin Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) boostada caadiga ah (regular mail).** Haddii uu ka yar yahay 20 bog kulligiis, waxaad ku diri kartaa fakis (604-666-3043).

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)
300 West Georgia Street, Suite 1600
Vancouver, BC V6B 6C9

3  Hal nuqul oo ah Foomka Dacwaddaada Qaxootinimo gasho galkaaga diiwaanka. Haddii ad Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) ku dirtid **boostada deg degga ah (courier)**, risiidka u hayso caddayn. Haddii ad Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) ku dirtid **fakis**, hayso warqadda sheegeysa in fakiskii si saxa u baxay.


? **Maxaa dhacayaa haddii an ku buuxin kari waayo waqtigii loogu tala galay Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC Form)?**

Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) haddii ad ku gudbin weydid waqtigii loogu tala galay xaalad deg deg ah awgeed, warqad u dir Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ugu yaraan

3 maalmood oo shaqo ka hor intaan la gaarin maalinta ugu dambaysa ad ku weydiisanaysid waqti dheeri ah. Haddii adan jawaab helin, foomkaaga ku gudbi waqtigii hore ee loogu tala galay, xataa haddii uusan wada buuxsanayn. Raaci warqad u sharraxaysa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) sababta ad ugu buuxin kari weyday waqtigii loogu tala galay.

B. Haddii ad dacwaddaada ka bilowdid xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ee Kanada gudeheeda:

Haddii ad leedahay qareen, ha kula buuxiyo Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) iyo dhammaan codsiyada kale.



Foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form) asalka ah oo ad buuxisay laba nuqul ka sameeyso, dhammaan foomamka codsiyadaada Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanadana (CIC) hal nuqul ka sameeyso.



2 Xafiiska Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) waxaad u geysaa Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) Asalka ah iyo hal nuqul, foomamkaaga codsiyada Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) asalka ah, iyo 4 masawir oo xubin kasta oo goyska ku jirta dacwaddaada qaxootinimo [ka eeg bogga 7 cinwaanka Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC)]. Tilmaamaha masawirada, booqo bogga internetka www.cic.gc.ca waxaadna raadisaa "Lifaaq A: Sifooyinka Gaarka ee Masawirada" ("Appendix A: Photo Specifications"). Nuqulka Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) iyo foomamka cadsiga Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) gasho galkaaga diiwaanka.

[Markaad gudbisid foomamkaaga, sarkaal ka tirsan Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ayaa kuu sheegi doona maalinta ad u soo laabanaysid Waraysiga U Qalmidda si loo go'aamiyo in ad u qalantid in ad qaxootinimo uga dacwootid Kanada iyo in kale. Marka lagu waraysto, haddii sarkaalku go'aamiyo in ad u qalantid, waxaa lagu siinayaa taariikhda maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada qaxootinimo, Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimada (BOC Form) waxaa loo dirayaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)].



3 Markaad foomamkaaga u gudbisid Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC), keen baasaboorkaaga ama warqad aqoonsi kalaa. Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada waxay kaa qaadaysaa aqoonsigii asalka ahaa, waxayna ku siinaysaa nuqul.

Haddii ad haysatid qoraalo kaloo rasmi ah oo xoojinaya dacwaddaada markaana diyaar kuu ah, waxaad u tarjumtaa luuqadda ad u dooratay in maxkamadda dacwaddaada lagu qaado oo ah Af Ingiriis ama Af Faransiis (English or French). Saddex nuqul ka samee qoraaladaada. Laba nuqul Foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form) ugu la gudbi Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC). Hal nuqulna gasho galka diiwaankaaga. Xaqiiji in qareenkaagu fursad u helo inuu dib u eego qoraalada rasmiga ah dhammaantood inta adan u gudbin Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC).



Maxaa dhacaya haddii an wax ka ilaaway ama wax ka khalday Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC Form)?


Waa in adiga ama qareenkaagu isla markiiba la xiriiro Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalinta Qaxootiga (IRB-RPD)! Raac tallaabooyinka:

- Nuqulkaaga Foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form) ku same wixii ad baddalaysid, hoostana ka xariiq, bog kasta oo ad wax ka baddashayna taariikhee, magacaagana ku saxiix.
- Warqad u qor ad ku sharraxaysid sababta ad u samaysay baddalaadahan. Waxaad ku qortaa,

"Baddalaadahaanu waa dhan yihiin, waa run, waana sax, waxaan fahmayaa in caddayntaanu ay dhanka sharciga la culays iyo saamayn tahay sidii anoo dhaartay oo kale an sameeyey".

- Warqaddaada taariikhee saxiixna.
- Hal nuqul oo ah foomka bogaggii asalka ahaa iyo bogaggii wax laga baddalay oo ay la socoto warqaddaadu u gudbi Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ugu yaraan 10 maalmood ka hor maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada.
 - Hal nuqulna gasho galka diiwaankaaga.

Uruurinta Caddaymaha: Dulmar Kooban



Waa muhiim in ad soo uruursid caddaymaha xoojinaya dacwaddaada qaxootinimo. Taasoo macnaheedu yahay in ad soo uruursid qoraalo rasmi ah intii ad awoodi kartid oo muujinaya in ad runta ka sheegaysid wixii kaa qabsaday dalkaagii. Qoraaladaan rasmiga ahi waxay kaloo Xubinta Guddoonka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ka caawimayaan in ay fahamto xaaladaha bini aadamnimo ee ka jira waddankaagii kuwaasoo khuseeya dacwaddaada. **Qoraalada rasmiga ah dhammaantood waa in loo turjumo Af Ingiriis ama Af Faransiis inta adan u gudbin Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD).**

Iminka ku dhaqaaq in ad uruursid caddaymo xoojinaya dacwaddaada! Haddii ad qareen leedahay, weydii caddaymaha gaarka ah ee ad ugu baahan tahay dacwaddaada, qareenkana la socodsii hadba wixii qoraalo rasmi ah ee ad soo heshid. Xaqiiji in ad qareenka siisid waqti ku filan ee u dib ugu eego caddaymaha, turjumna caddaymaha.

Guud ahaan, waa in ad keento laba nooc oo ah caddaymo xoojinaya dacwaddaada.

1 Caddayn si gaar ah u khusaysa dacwaddaada:

a Caddaynta noocaan ah ee xoojinaysa dacwaddaada waxay muujinaysaa in ad adigu khatar ku jirtid. Tusaale ahaan:

- Ma jiraan wax ah masawirro, warqado, fiidiyoyaal, iimeylo, ama qoraalo kaloo rasmi ah oo muujinaya dhibaatooyinka ku soo gaaray? Kuwaa keen!
- Ma ugu tagtay caawimaad booliska ama hay'ad kaloo dawladda ah? Keen warqaddii warbixinta booliska ama wax kaloo caddaynaya booqashadaadii.
- Ma heshay wax gargaar caafimaad ah? Keen warqadahaagii isbitaalka ama dhakhtarka.
- Ma jiraan maqaallo warbaahineed ku saabsan dad lug ku leh dacwaddaada? Kuwaa keen!
- Ma jiraan dad goobjoog ka ahaa wixii kugu dhacay? Weydiiso in ay qoraan wixii dhacay, kuuna soo diraan. Haddii ay suurtagal tahay, dadkaa weydiiso in ay nootaayo (notary) ama qareen hortiis ku dhaartaan (caddeeyaan) in caddayntoodu run tahay.
- Ma jiraan dad soo maray dhibaatooyin la mid ah kuwii adiga kugu dhacay? Weydiiso in ay qoraal ku muujiyaan waxyaabihii soo maray. Haddii ay suurtagal tahay, dadkaa weydiiso in ay nootaayo (notary) ama qareen hortiis ku dhaartaan (caddeeyaan) in caddayntoodu run tahay.
- Dacwaddaada qaxootinimo ma waxay ku salaysan tahay nooca diintaada mise xubinnimadaada xisbi siyaasadeed ama koox kale? Keen qoraalo rasmi ah oo muujinaya xubinnimadaada.
- Caafimaadka maskaxdaada wax ma soo gaareen waxyaabihii kugu dhacay awgood? Warbixin ka keen dhakhtar ama dhakhtar cilmi-nafsi (psychologist) Kanada oo warbixin rasmi ah ka sameeya dhibaatooyinkaaga caafimaad. Waqti dheer bay qaadan kartaa in ad heshid warbixinta, marka ballan samayso sida ugu dhakhsa badan ee suurtagalka ah. Haddii aysan suurtagal ahayn in ad warbixinta hesho ka hor dhagaysiga dacwaddaada, warqad u qor Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ad ugu sheegaysid in ad ku hawllan tahay in ad heshid warbixin, dadaalada ad samaysay in ad warbixinta hesho dhagaysiga dacwadda ka hor, iyo taariikhda ad filayso in warbixintu diyaar noqoto. Weydiiso Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in dacwadda dib laguugu dhigo inta ad warbixinta ka heleysid. Waxaa dhici karta in Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu ku tiraahdo waa inaad dhagaysiga dacwadda u gashaa taariikhda lagu qabtay. Haddii ay sidaa noqoto, xaqiiji in ad sharraxdid dhibaatooyinka caafimaad ee maskaxdaada marka la dhagaysanayo dacwaddaada, caddeena siyaabaha ay wax ugu dhimeen xusuustaada iyo awooddaada ad ku sharraxaysid waxyaabihii kugu soo dhacay.



? Fiidiyoyaasha, rugaha internetka, ama qoraalada kaloo danabka ah (other electronic documents) miyaa loo baahan yahay in la turjumo?

Haa! Dhammaan caddaymaha ad heshid waa in loo turjumo Af Ingiriis ama Af Faransiis. Fiidiyoyaasha waa in la qoraa. Turjumaaddu qaali bay noqon kartaa. Haddii adan awoodin in ad turjumto wax kasta, kuwa

ugu muhiimsan qoraalada ka dooro. Qoraal ugu sheeg Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in ad haysid qoraalo kale oo adan awoodin in ad turjumto. U qaado maxkamadda dhagaysiga dacwadda, una sharrax Xubinta Guddoonka Maxkamadda waxa qoraalada ku yaal.

b Waxaad kaloo u baahan tahay warqado aqoonsi oo ad ku caddaysid waddaniyaddaada, kuna xoojisid caddaymahaaga sababta ad khatarta ugu jirtid waddankaagii (eeg bogga 23 tusaale ahaan). Haddii ad warqadaha aqoonsiga heshid ka dib waraysigaaga u qalmidda qaxootinimo, waa inaad sida ugu dhakhso badan ugu dirtaa nuqulada warqadahaaga aqoonsiga Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD).

2 Caddaymaha xaaladda xuquuqda aadanaha waddankaagii:

Caddaymaha noocan ah waxaa ka mid ah warbixinada ila wareedyo lagu kalsoon yahay oo qoraal ku caddeeyey xadgudubyada xuquuqda aadanah , dhacdooyinka siyaasadda, iyo warar kaloo la xiriira dacwaddaada.

Tusaale ahaan:

- Qoraalada Warbixinada Waddamada ay Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ka diyaarisay waddankaaga waxaad ka heli kartaa: www.irb-cisr.gc.ca [raadi "Qoraalada Warbixinada Waddamada (NDP)" doorana waddankaaga].

Qoraalada Warbixinada Waddamada (NDP) ee waddankaaga waxaa diyaariyey waaxda cilmi-baarista ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qabta Magangalinta Qaxootiga (IRB-RPD). Waxaa ku jira qoraalo ka hadlaya xaaladaha ka jira waddankaaga waxayna u kala qaybsan yihiin faracyo (qaybo). Akhriso qaybaha adiga ku khuseeya. Xubinta Guddoominaysa maxkamadda dhagaysiga dacwaddaadu waxay isticmaalaysaa macluumaadka ku jira qoraaladaan si ay uga caawiso in ay go'aan ka gaarto dacwaddaada. In badan oo Qoraalada Warbixinada Waddamada (NDP) ka mid ah waxaa dhici karta in la diyaariyey in ka badan sanad ka hor. Haddii ay suurtagal tahay, waa inaad keentid warbixinadii ugu dambeeyey.



- Warbixinadii ugu dambeeyey ee ururada xuquuqda aadanaha (sida Amnesty International, Human Rights Watch), warbixinada Qaramada Midoobay, warbixinada waddamada ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda Maraykanka, maqaallada warbaahinta, ama fiidiyoyaasha muujinaya dhibaatooyinka xuquuqda aadanaha ka jira waddankaaga. Warbixinadaan qaarkood waxaa laga heli karaa Qoraalada Warbixinada Waddamada (NDP) an kor ku soo sheegnay, haseyeeshee waa inaad raadisid haddii ay jiraan warbixino ka sii dambeeyey. Waxaad kaloo ka heli kartaa xiriiriyeyaasha (links) warbixinada ku saabsan xaaladda waddankaagii halkan: www.kinbrace.ca/rhp-guide/country-conditions.
- Maqaalada iyo warbixinada ay qoreen wargeysyada iyo ururada xuquuqda aadanaha waddankaaga.

? Maxaa dhacaya haddii an heli waayo qoraalada qaarkood ka hor maxkamadda dhagaysiga dacwaddayda?

Waa inaad maxkamadda ka caddeysaa sababta ad u heli weyday. Sharrax dadaalada ad samaysay (iimeyllada, warqadaha, boostada deg

degga ah, telefoonada) iyo taariikhaha ad isku dayday in ad heshid. Maxkamaddaada keen nuqulada iimayllada, warqadaha ama caddaymaha boostada deg degga ah.

Uruurinta Caddaymaha: Qeexidda Ereyada Sharciga



Si ad ugu guulaysatid maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada, waa inaad keentid caddayn muujinaysa in ad ka soo baxday qayb kasta oo ka mid ah qeexidda sharciga ee “Qaxootiga Caadiga ah” (“Convention Refugee”) ama “Qof U Baahan Magangalyo” (“Person In Need of Protection”) sida ku qeexan Xeerka Socdaalka iyo Magangalyada Qaxootiga (Immigration and Refugee Protection Act). Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) marka ay dacwaddaada qiimaynaysa waxay tixgalin doontaa qodobbada adiga ku khuseeya qeexidda sharciga. Haddii ad waddani ama daggane ka tahay in ka badan hal waddan, waa inaad muujisid in ad khatar ku galaysid waddan kasta. Bogogga soo socdaa waxay kaa caawimayaan in ad fahamtid qodobbada Xubinta Guddoonka Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay tixgalin doonto marka lagu jiro dhagaysiga dacwaddaada, iyo nooca caddaymaha lagaa rabo in ad u keentid qodob kastoo ku qeexan sharciga.

Tusaalayaasha caddaymaha, eeg bogogga 17, 18 iyo 23–27 ee BuugHagahaan.

Qeexidda “Qaxootiga Caadiga ah” (“Convention Refugee” Definition)


[Eeg Qaybta 96 ee Xeerka Socdaalka iyo Magangalyada Qaxootiga (Immigration and Refugee Protection Act)]

Si ad uga soo baxdid qeexidda “Qaxootiga Caadiga ah” (“Convention Refugee”), waa in ad muujisaa in ad ka soo baxday dhammaan lixda qaybood ee qeexidda hoose:


Ma ka soo baxday qaybtaan qeexidda?

Maxaad caddaymo keeni kartaa ad ku muujinaysid in ad ka soo baxday qaybtaan qeexidda?


1 haddii an ku laabto waddankaygii, waxaa aad u suurtagasha in an la kulmo ciqaab (Qodobka Sharciga: Ciqaab),
Iyo



2 ciqaabtaasu waxay ku salaysan tahay: sinjiyaddayda / diintayda / jinsiyaddayda / ra'yigayga siyaasadeed / ama koox bulsho* gaar ah oo an xubin ka ahay [Fiiro gaar ah: Ereyga “koox bulsho” waxaa looga jeedaa kooxo badan oo kala duwan, ayna ka mid yihiin kooxo ku salaysan jaadka qofka (lab/dheddig), dookha galmada, lixaadka oo dhimman, qoyska, ururo shaqaale, iwm.],
Iyo




3 waxaan si dhab ah uga baqayaa in an ku laabto waddankaygii (Qodobka Sharciga: Cabsi shakhsi),
Iyo




4 Waxaan qiil fiican u haystaa baqitaankayga oo ku salaysan xaaladda ka jirta waddankaygii,
Iyo



5 Dawladdayda oo an ammaankayga sugi karin (Qodobka Sharciga: Nabadgalyada Waddanka),
Iyo



6 anan nabadgalyo ugu noolaan karin meel kaloo ka mid ah waddanka ama aysan caqli gal ii ahayn – qofka an ahay awgeed – in an u guuro meel kaloo ka mid ah waddanka. (Qodobka Sharciga: U Barakicid Meel Kaloo Waddanka).



* Haddii ad tahay qof dumar ah waxaad akhrisan kartaa xeerarka noocyada dhibaatooyinka gaarka ah ee dumarku la kulmo.

Xeerarka Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR):
www.refworld.org/pdfid/3d36f1c64.pdf

Xeerarka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB):
www.irb-cisr.gc.ca/Eng/BoaCom/references/pol/GuiDir/Pages/GuideDir04.aspx

Haddii ad tahay khaniis ama khaniisad ama qof jinsiisa baddalay, waxaad akhrisan kartaa xeerarka Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) ku saabsan ciqaabaha ku salaysan dookha galmada:
www.unhcr.org/509136ca9.pdf

Qeexidda “Qof Magangalyo U Baahan” (“Person in Need of Protection” Definition)


[Eeg Qaybta 97 ee Xeerka Socdaalka iyo Magangalyada Qaxootiga (Immigration and Refugee Protection Act)]

Si ad uga soo baxdid qeexidda “Qof Magangalyo U Baahan” (“Person in Need of Protection”), waa in ad muujisaa in ad ka soo baxday Qaybta 1 AMA 2 ee hoose:

Ma ka soo baxday qaybtaan qeexidda?

Maxaad caddaymo keeni kartaa ad ku muujinaysid in ad ka soo baxday qaybtaan qeexidda?

- 1** haddii an ku laabto waddankaygii, waxay u badan tahay in an la kulmo jirdil dawladda waddankaygu ii geysato.




AMA

- 2** haddii an ku laabto waddankaygii, waxay u badan tahay in naftaydu khatar gasho, ama la kulmo khatar ciqaab ama dhaqan xun oo arxan darro an caadina ahayn,

lyo




- a** dawladdayda oo an ammaankayga sugi karin (Qodobka Sharciga: Nabadgalyada Waddanka),
- lyo



- b** anan nabadgalyo ugu noolaan karin meel kaloo ka mid ah waddankayga ama aysan caqli gal ii ahayn – qofka an ahay awgeed – in an u guuro meel kaloo ka mid ah waddankayga

(Qodobka Sharciga: U Barakicid Meel Kaloo Waddanka).


lyo



- c** khatartaanu anigay gaar igu tahay ilamana wadaagaan dadweynaha guud ee waddankaygu

(Qodobka Sharciga: Khatar Guud),

iyo



- d** khatartaanu MA AHA sabab waddankaygu doonayo in uu igu ciqaabo xeer an jabiyeey kaasoo dambi ka ah Kanada


(Qodobka Sharciga: Cabsi Dambi Kusoo Oogid, ahayn Waxyeellayn),

iyo



- e** khatartaanu MA AHA sabab daryeel caafimaad hooseeya waddankaygii awgeed.

(Magangalyo waad heli kartaa haddii ad muujisid in daryeel caafimaad lagu diiday takoorid awgeed.)



Uruurinta Caddaymaha: Arrimaha Sharciga



Arrimaha sharciga qaar ay dhici karto in lagu soo qaado maxkamadda dacwaddaada waxaa ka mid ah:

- Aqoonsiga
- Aaminaadda
- Cabsida Shakhsiyeed
- Khatarta Guud
- Nabadgalyada Waddanka
- U Barakaca Meela Kaloo Waddankaa
- Dagganaansho Sharci Waddan Kale

Mid kastoo arrimahaan sharciga ahi waxay ku xiran tahay qayb kaloo ka mid ah Qeexidda Sharciga ee "Qaxootiga Caadiga ah" ("Convention Refugee") ama "Qof U Baahan Magangalyo" ("Person in Need of Protection").

Bogogga soo socda, si taxadar leh u akhri sharraxaadda arrimahaan sharciga la xiriira. Arrin kasta hoosteeda ku qor waxyaabaha ad caddaymaha u soo uruurinsid si ad uga hadashid arrinkaas.

Qareen kala tasho arrimaha sharciga ugu muhiimsan dacwaddaada qaxootinimo.

Aqoonsiga (Identity)

Waa inaad tustid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in ad tahay qofka ad sheegatay in ad tahay. Taa waxaa ka mid ah aqoonsigaaga waddaninimo ama dagganaanshaha ee waddankaaga ama waddamada ad dagganayd. Waxaa kaloo ka mid noqon kara xiriir ad la leedahay diin ama beel gaar ah, xubin ad ka tahay urur xirfadlayaal, siyaasadeed ama shaqaale, dookhaaga galmo, ama xubin ad ka tahay koox kaloo bulsho. Haddii adan heli karin qoraalo caddaynaya meel ka mid ah aqoonsigaaga oo khusaysa dacwaddaada, waa inaad sababta u sharraxdid maxkamadda dacwaddaada.

Waxaa dhici karta in lagu xiro haddii adan haysan warqado aqoonsi ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) ay doonayso in ay xaqiijiso in warqadahaaga aqoonsigu sax yihiin.

Tusaaleyaal caddaymo:

- Si ad u caddaysid in ad tahay waddani waddankii ad ka timid: baasaboora, kaarka aqoonsiga, kaarka aqoonsiga ciidamada, shahaado guur, waxbarashadii iskoolka
- Si ad u caddaysid xiriirkaaga diimeed: shahaadadii qaadashada diinta, warqad u soo qoray madaxa diintaadu (shiikha magaalada)
- Si ad u caddaysid xubinimadaada urur siyaasadeed ama xirfadlayaal: kaarka aqoonsiga, warqad u soo qoray ururku, waxbarashadii xirfaddii ad baratay, shahaadooyin
- Si ad u caddaysid dookhaaga galmada: warqad ay soo qortay koox bulsho, lammaanahaaga, ama xubin qoyskaaga ah. Markkhaatiyadaasu waa inay bixiyaan faalada ugu badan inta ay awoodaan si ay u muujiyaan sida ay ku ogaadeen in ad ka mid tahay kooxdan bulsho ee loo yaqaan LGBTQ



Caddaymahayga:



Aaminaadda

Waa inaad tusid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in ad runta ka sheegaysid waxyaabihii ku soo maray. Si ay go'aan uga gaarto in ad runta sheegaysid iyo in kale, Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) waxay isku fiirinaysaa xogta ad ku qortay Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), jawaabihii ad maxkamadda dacwaddaada ka bixisay, wararka wargeysyada iyo warbixinada hay'adaha xuquuqda aadanaha, iyo maragfurka markhaatiyaasha kale si ay u xaqiijiyaan in ay isleeyihiin. Haddii ay jiraan wax is khilaafsan oo adan jawaab ku habboon ka bixin, waxaa dhici karta in Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay go'aansato in adan ahayn qof la aamini karo. Run sheegiddaada waxaad ku xoojin kartaa adoo soo uruurinaya qoraalo caddaynaya in dacwaddaada xoga gaara oo ku jiraa ay run yihiin. Waxaase nasiib darraa, in ay badanaaba nagu adagtahay xusuusta faalada, wixii na soo maray iyo wixii dadka kale soo maray. Haddii ad dad kale weydiisatid

in ay kuu markhaati furaan maxkamadda, u sharrax sababta maragfurkoodu u khuseeyo dacwaddaada. U sharrax in Xubinta Guddoonka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay go'aan ka gaarayso in ay yihiin dad la rumaysan karo, taasoo ku salaysan in maragfurkoodii ay ku dhex jiraan wax isdhaafsan ama ay jiraan wax isdhaafsan maragfurkoodii iyo kaagii.



Tusaaleyaal caddaymo:

- Warbixinada waddankaagii muujinaya dhibaatooyinka xuquuqda aadanaha ka jirta oo la mid ah ama caddaynaya kuwa ad dacwaddaada ku sheegtay
- Warbixinada daawo/isbitaal ama warqadaha lacag bixinta
- Warbixinada booliska
- Masawirro muujinaya dhaawacyo kugu yaal
- Qoraalo ay sameeyeen markhaatiyaal dhaartay
- Warqad u qoray dhakhtarkaaga Kanada oo muujinaysa daqarro ama dhaawacyo

Caddaymahayga:



Cabsida Shakhsiyeed

Si ad uga soo baxdid qeexidda sharciga ee "Qaxootiga Caadiga ah" ("Convention Refugee") waa in ad muujisid in ay jirto cabsi dhab ah oo waxyeello laguugu geysanayo waddankii ad ka timid. Si ay go'aan uga gaarto in cabsidaadu tahay mid run ah, Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) waxay ku weydiinaysaa su'aalahaan oo kale:

a. Ma ku laabatay waddankaagii ad ka cabsanaysid in waxyeello laguugu geysto markii ad ka tagtay ka bacdi?
(Qodobka Sharciga: Dib Uga Faa'iidaysi)

b. Ma soo martay waddan kaloo ammaan ah (sida Maraykanka) intii ad Kanada ku soo socotay, laakiin adan qaxootinimo uga dacwoon?

(Qodobka Sharciga:
An Ka Dacwoon Meel Kale)

c. Ka dib markii waxyeelada laguugu geystay waddankaagii, ma sii joogtay waddankaagii inkastoo ad haysatay furad ad kaga tagi kartay si ka sii dhakhso badan?

(Qodobka Sharciga: Dib U Dhac Bixitaan)

d. Markii ad Kanada timid, ma muddaad sugtay inta adan u dacwoon qaxootinimo?

(Qodobka Sharciga: Dib U Dhac Dacwad)



Haddii jawaabtaada su'aalahaan midkood ay tahay "haa", waxay u badan tahay in maxkamaddaada lagu wediyo in ad sababta sharraxdid. Uruurso caddaymo ad ku xoojisid sharraxaaddaada. Ka fakar sidii ad u sharraxi lahayd go'aamadii ad qaadatay. U diyaargarow in ad u sharraxdid Xubinta Guddoonka sababta adan isla markiiba uga bixin waddankaagii

ama sababta adan isla markiiba ugu dacwoon magangalyo qaxootinimo. Ma waxaad ka raja qabtay in xaaladda waddankaagu isbaddasho? Maxay ahaayeen dhibaatooyinka ad la kulantay si ad uga baxdid waddankaagii? Maxaad dacwaddaada u samayn weyday isla markii ad timid?



Caddaymahayga:

Khatarta Guud

Waa in ad muujisid in khatarta ad ku sugan tahay ay adiga gaar kugu tahay oo aysan la mid ahayn khatarta guud ee dadka kaloo dhan haysata. Taasoo macnaheedu yahay haddii ad ka timid waddan ay ku badan yihiin rabshaduhu, waxaa lagaa rabaa in ad muujisid sababta adiga, shakhsiyan, ad khatarta ugu sugan tahay.

Haddii ad ka timid waddan uu ka socdo dagaal sokeeye, waa in ad akhrisataa xeerarka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB) ee ka hadlaya shacabka ka baqaya in waxyeello loogu geysto xaaladaha dagaalka sokeeye: www.irb-cisr.gc.ca (raadi "shacab ku sugan halis waxyeello"), si ad u fahamtid sidii ad u muujin lahayd in ad u qalantid magangalyo marka lagu jiro xaalad ay dad badani khatar ku sugan yihiin.

Haddii ad ka baqaysid waxyeello ay kuu geystaan mooryaan dambiilayaal ah, waxaad u baahan tahay in ad akhrisato Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) "Xeerarkeeda Sheegaya Dacwooyinka Qaxootiga Khuseeya Dhibbaneyaasha Dambiyada Abaabulan": www.refworld.org (raadi "dacwooyinka qaxootiga dhibbaneyaasha dambiyada abaabulan").

Tusaalayaal caddaymo:

- Qoraallo ama farriimo telefoon laguugu duubay ad heshay oo ay ku jiraan hanjabaado waxyeello laguugu geysanayo
- Caddaymo qoraallo lagu dhaartay oo saaxiibbo ama markhaatiyaal kale caddaynayaan in adiga, ama dadka kaloo ku sugan xaaladdaada oo kale, ay noqdeen dhibbaneyaal waxyeello
- Masawirro muujinaya dhaawacyo lagu geystay, warbixino dhakhtar caddaynaya in waddankaagii lagugu daweyey, warbixino booliska waddankaagii
- Caddaymo qoraallo ama maqal iyo muuqaal ah oo ad ku muujinaysid in ad naftaada khatar ugu sugan tahay.



My evidence:

Nabadgalyada Waddanka

Waa in ad u muujisid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in dawladdaada aysan awoodin ama aysan ku badbaadinaynin. Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) waxay u qaadanaysaa in dawladdaada ku badbaadin karto haddii adan lidkeeda keenin caddayn ay ku qancaan.

Haddii ad isku day'day in dawladda waddankaagu ku badbaadiso haseyeeshee adan ka helin:

- Sharrax waxyaabihii dhab ahaan ad samaysay iyo sida dawladdu uga jawaabtay
- Isku day in ad heshid qoraallo muujinaya in ad raadsatay badbaadin
- Isku day in ad warbixino ka heshid waddankaagii muujinaya in aysan dawladdu

awoodin ama aysan badbaadinayn dadka ku sugan xaaladdaada

Haddii adan badbaado ka raadsan dawladda waddankaagii:

- Waa inaad sharraxdaa sababta adna keentid qoraallo caddaynaya in aysan caqligal ahayn in ad raadsato

Tusaalayaal caddaymo:

- Warbixino waddankaaga muujinaya in aysan jirin badbaado booliis iyo musuqmaasuq
- Warbixino ad booliiska u gudbisay
- Caddaymo qoraallo lagu dhaartay oo ay sameeyeen dad ku sugan xaaladdaada oo kale dawladduna aysan badbaadin



Caddaymahayga:



U Barakaca Meela Kaloo Waddanka

Haddii Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) go'aansato in ay macquul tahay in ad ku noolaan kartid meel kaloo waddankaagii ka mid ah, dacwaddaada

lama ogolaanayo.

Haddii arrinkan lagu soo qaado maxkamaddaada,

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada

Qaxootiga (IRB-RPD) waxay kuu sheegi doontaa gobolka gaarka ah ee ay rumaysan yihiin in ad si nabadgalyaa ugu noolaan kartid. Waxaa lagaa rabaa in ad keentid caddayn muujinaysa:

a. In adan si nabadgalyaa ugu noolaan karin gobolka kale, ama

b. In aysan caqli gal kuu ahayn in ad isku daydid in ad ku noolaato gobolka kale (marka la eego da'daada, lab ama dhaddig ahaantaada, ama xaaladdaada gaarka ah, ama

c. In aysan jirin si ad ku tagi kartid gobolka kale, sababtoo ah waxaan loo tagi karin sabab: dagaal, musiibo dabiici ah, ama sabab kale.

Tusaalayaal Caddaymo:

- Qoraallo muujinaya in ad isku day'day in ad dhibaataada ka cararto adoo aadaya meel kaloo ka mid ah waddankaagii
- Warbixino muujinaya in dhibaataada ku haysataa ay ka jirto waddanka oo dhan. Tusaale ahaan, dadka doonaya in ay ku waxyeelleeyaan ay ka hawlgalaan waddankoo dhan, ama takoorka ad ka baqaysid uu ka jiro waddankoo dhan

- Warbixino waddankaagii muujinaya sababta qofkii adiga kula mid ah ay ugu adag tahay in uu ku noolaado meel kaloo ka mid ah waddankaaga. Tusaale ahaan, warbixino sharaxaya dhaqanka waddankaagii oo

muujinaya sababta ay ugu adag tahay qofkii adiga kula mid ah in uu u guuro gobol kale. Waxaad kaloo muujin kartaa in meesha ay saamaysay dagaal sokeeye ama musiibo dabiici ah ama dhibaatooyin kaloo adag.

Xusuus: Kuma filna in ad tiraahdid in adan qofna ka aqoon gobol kaloo ka mid ah waddankaagii, ama adan shaqo ku haysan meeshaas. Ugu dambayntii, in badan oo dadka u dacwoonaya qaxootiga cidna kama yaqaanaan, shaqana kama haystaan Kanada marka ay yimaadaan. Waa inaad keentid sabab ka wanaagsan tan.



Caddaymahayga:

Dagganaansho Sharci Waddan Kale

Haddii ad sharci waddani amd dagganaansho ah ku leedahay hal waddan in ka badan, waa in ad muujisid in ad khatar uga jirtid mid walba. Kanada waxay ku magangalinaysaa oo kaliya haddii ad ka soo baxdid sharciyada lagu qeexay qofka qaxootiga caadiga ah ama qof magangalyo u baahan ee waddan kasta ee ad xaq u leedahay in ad ku noolaatid.



Kanada haddii ay ogaato in ad khatar uga jirtid hal waddan, haseyeeshee ad si nabadgalya ah ugu noolaan

kartid waddan kale, dacwaddaada qaxootinimo waa la diidayaa.

Tusaalayaal caddaymo:


- Haddii ad xaq u leedahay in ad ku noolaatid hal waddan in ka badan, waxaa dhici karta in ad khatarro isku mid ah ama kala duwan uga jirtid waddan kasta. Ka fikir nooca khatarta ad uga jirtid waddan walba, keenna intii caddaymo ad awoodid ee khatartaa.

- Waxaa dhici karta in Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay aaminsan tahay in ad xaq u leedahay in ad ku noolaatid waddan kale, haseyeeshee adigu adan rumaysnayn in arrintaasu sax tahay. Haddii ad lahaan jirtay sharci waddani ama dagganaansho ee waddan kale haseyeeshee ad dhumisay xuquuqdaas, u keen Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) caddayn qoraala oo ad ka keentay dawladda waddankaas oo muujinaysa in adan xaq dambe u lahayn in ad ku noolaatid halkaas.
- Haddii ad ku dhalatay waddan, haseyeeshee adan waligaa qaadan dhalashada waddankaas, Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) u keen nuqul ah sharciga dhalashada waddankaas. (Badanaaba waxaad ka heli kartaa internetka.)



Caddaymahayga:

Gudbinta Caddaymahaaga



Dhammaan caddaymahaaga waa inaad u turjuntid Af Ingiriis ama Af Faransiis, una gudbisid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ugu yaraan 10 MAALMOOD ka hor maxkamadda dhagaysiga dacwaddaada. Haddii ad qareen leedahay, asagaa kuu gudbinaya caddaymaha. Xaqiiji in ad qareenka siisid waqti ku filan oo u dib ugu fiiriyo caddaymaha una turjumo inta an la gaarin maalinta ugu dambaysa in loogu gudbiyo Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Haddii adan qareen lahayn, raac tallaabooyinka 1–10 ee bogga soo socda.

Waa in ad siisid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) magacyada markhaatiyaashaada 10 maalmood ka hor maxkamadda dacwaddaada. Fadlan ka eeg bogogga 34 iyo 37 wixii macluumaad dheeri ah ee markhaatiyaasha.

Ha gafin maalintan kama dambaysta ah!

Si ad u gudbisid caddaymaha iyo qoraalada xoojinaya dacwaddaada, raac tallaabooyinka:

1 Caddaymahaaga iyo qoraaladaada u turjum Af Ingiriis ama Af Faransiis. Qoraal walba raaci Caddaynta turjumaanka oo ay ku jiraan:

- Magaca iyo saxiixa turjumaanka
- Afka asalka ah iyo lahjadda
- Caddaynta turjumaanka in turjumiddu sax tahay

2 Caddaymahaaga ku daabac, iskaangaree, ama masawir warqadaha caadiga ah oo cabbirkoodu yahay 8.5 x 11 inji (8.5 x 11 inch, letter-size paper). Caddaymaha teeb ama kombiyuutar lagu qoray waa in cabbirka fartu tahay ugu yaraan 12 foonti (size 12 font).

3 Caddaymahaaga isku gee (si ad uga dhigtid hal caddayn oo weyn) bogoggana nambarro u yeel ad ka bilowday kow ilaa dhammaad (1, 2, 3, 4, 5, ...).

4 Waxaad ku dartaa bog kore oo ad ku qortay magacaaga iyo cinwaankaaga, taariikhda, nambarka galka dacwaddaada ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (your IRB-RPD file number), liiska dhammaan caddaymahaaga iyo nambarda bogagooda.

5 Xirmada caddaymahaaga waxaad ka samaysaa laba nuqul [midna u gudbi Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), midna adigu gasho galka dliiwaankaaga].

6 Haddii Qareenka Wasiirku (wakiilka Wasaaradda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada) u ka qaybqaadanayo maxkamadda dacwaddaada, waa in ad asagana xirmada caddaymahaaga hal nuqul u samaysid. Waa lagu sheegayaa haddii Qareenka Wasiirku ka qaybqaadanayo maxkamadda dacwaddaada, sababtoo ah waxay kuu soo diri doonaan ogeysiis ugu yaraan 10 maalmood ka hor maxkamadda.

7 Hal nuqul oo ah xirmada caddaymahaaga waxaad Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada

– Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ugu dirtaa boostada deg degga ah (courier). Haddii ad go'aansatid in ad ku dirtid boostada caadiga ah, xaqiiji in ad xirmada caddaymahaaga ku dirtid ugu yaraan 17 maalmood ka hor maxkamadda dacwaddaada si ad u habsatid waqtiga ay ku gaarayo. Xirmada caddaymahaaga waa in ay ku hesho Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) 10 maalmood ka hor maxkamadda dacwaddaada. Haddii caddaymahaagu ay ka yar yihiin 20 bog, waxaad ku diri kartaa fakis.

IRB-RPD
300 West Georgia Street, Suite 1600
Vancouver, BC V6B 6C9
Telefoon: 1-866-787-7472 Fakis: 604-666-3043
Isniin ilaa Jimce 8:00 am – 4:00 pm

8 Haddii ad caddaymahaaga ku dirtid boostada deg degga ah, warqadda ad ku dirtay caddayn u hayso. Haddi ad ku dirtay fakis, hayso warqadda caddaynaysa in fakiskii si sax ah u dirmay.

9 Haddii Qareenka Wasiirku ka qaybqaadanayo maxkamadda dacwaddaada, hal nuqul oo ah xirmada caddaymahaaga u dir Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) ama Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) (hadba kan ka soo qaybgalaya maxkamadda dacwaddaada). Cinwaanka Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada iyo Wasaaradda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada wuxuu ku qoran yahay Ogeysiiska Faragalinta (Notice of Intervention) oo Wasiirku kuu soo dirayo. Sidoo kale, warqad u dir Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ad ugu sheegaysid in ad hal nuqul oo ah caddaymahaaga u dirtay Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) ama Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada(CIC).

10 Dhammaan qoraalada iyo caddaymaha dacwaddaada la xiriira, oo ay ku jiraan asalkii iyo nuqulladii, keen maxkamadda dacwaddaada.



Ma waxaan u baahnahay in turjumaan la sharciyeeyay uu turjumo qoraallada caddaymahayga?

Turjumaanada sharciyeysan baa ugu fiican, haseyeeshee khasab ma aha. Haddii adan iska bixin karin turjumaan sharciyeysan, waxaad heli kartaa in qof kaloo ad ku kalsoon tahay uu kuu turjumo caddaymahaaga (sida wanaagsanna an ahayn ehelkaaga). Qofkaasu waa inuu waliba saxiixaa caddaynta turjumaanka.



Maxaa dhacaya haddii an heli waayo warqad muhiim ah ilaa maalinta ugu dambaysa caddaymahayga ka dib ama maxkamadda dacwaddayda ka dib?

Warqad u qor Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) una sheeg. Marka ad warqaddaas heshid, sida ugu dhakhso badan ugu gudbi. Sharrax sababta ay warqaddaasi muhiimka ugu leedahay dacwaddaada iyo dadaalka ad u gashay in ad ku heshid waqtigii la rabay.

Dhawrida Caafimaadkaaga Intaad Isu Diyaarinaysid Maxkamadda Dacwaddaada

// Maxkamadda dacwaddayda ka hor aad baan u walwalay waana seexan waayey. Sugitaanku wuxuu ahaa mid culays iyo kadeed badan. //

– Saman, qof qaxooti u dacwooday mar hore



Dadka badankooda, waqtiga ka horreeya maxkamadda dacwaddoodu aad buu u dhib badan yahay. Fiiri waxa ay qaxootigaan horee kale ay sameeyeen si ay caafimaadkooda u dhawraan.

"Waxaan isku dayey in an isdajiyo oo iskula hadlo in an guulaysan doono."
-Ahmed

"Waxaan mala awaalay anoo dhex fadhiya qolka maxkamadda dacwaddayda, oo ka jawaabaya su'aalaha adag."
-Maria

"Tukasho joogta ah ayaa iga caawisay inaan dago."
-Chen Jin Yi

"Waxaan isku dayey in an xusuusto inta awooddayda ah waxyaabihii igu soo dhacay. Mar walboo an isku sii dayo in an wax xusuusto, waxaa igu soo dhacayey xusuuso dheeraad ah."

-Benoit

"Waxaan dhagaysan jiray heeso, buugaagna waan akhrisan jiray."
-Medin

"Waxaan qoyskayga kula hadlay SKYPE."
-Mohamed

"Waxaan isku dayey in an is mashquuliyo. Waxaan qaatay xiisado Af Ingiriis ah waxaan aaday xarunta bulshada."
-Dawit

"Waxaan aad uga shaqayn jiray dacwaddayda anoo soo uruurinaya caddaymo intii suurtagal ah. Taasaa waxay iga dhigtay in an dareemo in an shaqo waxtar leh qabanayo."
-Claude

"Waxaan aaday dabaal iyo noocya kaloo jimicsi ah"
-Victoria

"Waxaan helay shaqo iskaa wax u qabso ah, taasaana mashquul iga dhigtay iyo inaan caadi noqdo."
-Tesfaye

"Waxaan baaray baraha internetka (websites) waxaan helay macluumaad iyo xogo ku saabsan nadaamka maxkamadda dacwadda qaxootiga."
-Jagathragavan

"Qolkaygaan ka baxay. Waa kaligay wax an ku madadaashana ma leh, waxaan aad uga fakaray dacwaddayda markaan kaligay ahaa."
-Hanna

"Markaan soconayo, waxaan ku celcelin jiray sidaan su'aalaha uga jawaabi lahaa."
-Sara



Waxyaabaha an sameeyo si an caafimaadkayga u dhawro:

Maalinta Maxkamadda Dacwaddaada

Maxkamadda dacwaddaadu waa dhacdada ugu muhiimsan nadaamka (habka / qaabka) dacwaddaada qaxootinimo. Waxaa dhici karta in ad su'aala badan qabtid inta ad isu diyaarinaysid maalinta maxkamadda dacwaddaada.

Xaggee maxkamadda dacwaddayda lagu qabanayaa?

Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (Immigration and Refugee Board – Refugee Protection Division)
Canada Place – Conference Centre
9th Floor, 9700 Jasper Avenue NW
Edmonton, Alberta

(Waxaad qaadataa wiishashka muraayaddaa ee dhexe oo ku yaal dhanka bari ee dhismaha)

Goorma ayaa la iga rabaa in an imaado?

Ugu yaraan 15–30 daqiiqo ka hor waqtigii loo qabtay maxkamadda dacwaddaada. Taasu waxay waqti kuu siinaysaa in ad heshid qolka maxkamaddu ka dhacayso, ad kula hadashid turjumaanka si ad u habsatid in ad is fahmaysaan, ad musqusha ku gashid, adiguna isu diyaarisid. Haddii ad wadatid goob joogayaal ama markhaatiyaal, waa inay yimaadaan ugu yaraan 15 daqiiqo ka hor waqtiga maxkamadda.

Yaa ka soo qaybgalaya maxkamadda dacwaddayda?



Xubinta Guddoonka
(uga qaybgalayaa maqal iyo muuqaal ahaan)
(Kaalinta / Dooroka: Go'aanka ayuu gaaraa)

Goob Joogayaasha
Waxaad u yeeri kartaa saaxiib ama xubin qoyskaaga ah. Wakiilka Hay'adda Qaxootiga Qaramada Midoobay (UNHCR) baa imaan kara maxkamadda dacwaddaada

Qareenka (Wakiilka) Wasiirka
Qof wakiil ka ah Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) ama Wasaaradda Socdaalka iyo Waddaninimada Kanada (CIC) ayaa mararka qaarkood yimaada. Hadduu imaanaayo, way ku sii sheegayaan maxkamadda dacwaddaada ka hor. (Kaalinta / Dooroka: Adiga ayuu kugu doodayaa)

Turjumaanka
Ayaa jooga haddii loo baahan yahay
(Kaalin / Door: Dhexdhexaad)

Qareenkaaga
(Kaalin / Door: Adiga ayuu kuu doodayaa. Eeg bogga 9 haddii adan lahayn qareen.)

Adiga

Intee bay maxkamadda dacwaddaydu soconaysaa?

Badanaaba qiyaas ahaan 3.5 saacadood. Haddii dacwaddaada lagula dhagaysanayo xubna kaloo ka mid ah qoyskaaga ama ad qabtid baahiyo gaar ah, waxay qaadan kartaa maalin dhan.

Maxaa dhacaya maxkamadda dacwaddayda?

1. Hordhacyo: Xubinta Guddoonku waxay ku dhuwaaqaysaa (soo dhoweynaysaa) qof kasta oo jooga qolka, waxayna kuu sharraxaysaa qaabka maxkamaddu u dhacayso. Waxaa lagu weydiinayaa in ad ku dhuwaaqdid (dhaaratid) in ad runta sheegaysid. Haddii ad doonaysid in ad ku dhaaratid Kitaabka diintaada, qolka maxkamadda keen hal kitaab.
2. Liiska Bandhigyada (tusmooyinka): Xubinta Guddoonku waxay siin doontaa Nambar Bandhig (tusmo) qoraal kasta oo caddayn ad ugu gudbisay. Xaqiiji in ad nuqul ka haysatid caddayn kasta oo liiska bandhigga (tasmada) ku jirta, weydiisana Xubinta Guddoonka caddayn kasta oo adan nuqul ka haysan. Xubinta Guddoonku waxay kaloo fiirinaysaa qoraalka caddaymaha asalka ah ee ad maxkamadda keentid.
3. Su'aalaha (wareysiga): Xubinta Guddoonka, Qareenka Wasiirka (haddii u joogo), iyo qareenkaaga (haddii ad qareen leedahay) waxay su'aalo kaa weydiin doonaan taariikh nololeedkaaga, qoraalada caddaymahaaga iyo arrimaha sharciga ee muhiimka u ah dacwaddaada.
4. Markhaatiyaasha: Haddii ad markhaatiyo leedahay, waxay hadli doonaan marka ku xigta. Markhaatiyadu waxay joogi doonaan bannaanka qolka maxkamadda ilaa laga gaaro waqtigii ay furi lahaayeen maragooda (*eeg bogga 34*).
5. Faallooyin: Dhammaadka maxkamadda dacwaddaada, Xubinta Guddoonku waxay fursad siin doontaa qareenkaaga ama adiga si ad afkiina ugu sharraxdaan sababta ad u rumaysan tihiin in caddaymuhu muujinayaan in ad ka soo baxday shuruudihii qeexidda "qaxootiga Caadiga ah" ("Convention Refugee") ama "Qof U Baahan Magangalyo" ("Person in Need of Protection").
6. Go'aanka: Xubinta Guddoonka waxaa dhici karta in ay go'aan afkaa samayso dhammaadka maxkamadda, ama waxay qaadan kartaa waqti dheeraad ah go'aankana qoraal kuugu soo diri kartaa. Labada siyoodba, waxaad boostada ka heli doontaa "Ogeysiiska Go'aanka".

Badanaaba waxaa la qaataa waqti nasasho gaaban markay maxkamaddu socoto kalabar, waqtigaas oo ad musqusha isticmaali kartid ama ad wax soo cabbi kartid.

Waa maxay macnaha haddii Qareenka Wasiirku [wakiil ka socda Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA)] uu ka soo qaybgalo maxkamadda dacwaddayda?

Qareenka Wasiirka [wakiil ka socda Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA)] waxaa dhici karta in uu ka soo qaybgalo maxkamadda dacwaddaada. Waa lagu sheegi doonaa maxkamadda ka hor haddii Qareenka Wasiirku imaanayo maxkamadda, sababtoo ah waxay kuu soo dirayaan Ogeysiiska Faragalinta (Notice of Intervention). Ogeysiisku wuxuu kuu sheegayaa in Qareenka Wasiirku maxkamadda ka qaybgalayo ama un qoraallo maxkamadda keeni doono. QORAALLADA SI TAXADAR LEH U AKHRI – waxaa dhici karta in Wasiirku ku doodo in caddaymuhu muujinayaan in sheekadaadu aysan run ahayn.

Haddii Qareenka Wasiirku ka soo qaybgalo (soo faragashado) maxkamadda dacwaddaada, wuxuu ku doodi doonaa in an lagu siin sharciga qaxootiga. Qareenka Wasiirku wuxuu dacwaddaada uga soo horjeesan karaa sababa badan awgood: In ay rumaysan yihiin in adan runta sheegayn, in ay su'aalo ka qabaan qofka ad tahay, in ay rumaysan yihiin in ad dambi soo gashay ama ad ka tirsan tahay urur argagixisaa, ama sabab kale. Waa inaad Wasiirka weydiisid sababta ay maxkamadda dacwaddaada ugu soo qaybgalayaan haddii an arrintaas lagu sharraxin.

Maxaan u baahnahay in an maxkamadda dacwaddayda u soo qaato?

Soo qaado Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form), dhammaan warqadahaaga aqoonsiga asalka ah iyo caddaymaha kale ee ad u gudbisay Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA), Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Waxaad kaloo soo qaadataa warqad kasta oo dawladdu kuu soo dirtay ilaa markii ad timid Kanada.

Maxkamadda dacwaddaydu ma sir baa?

Dhammaan maxkamadaha dacwadaha qaxootigu waa sir. Taasoo macnaheedu yahay in dhammaan dadka ku jira qolka maxkamadda, oo uu ku jiro turjumaanku, aysan xogta dacwaddaada la wadaagi karin qof kale.

Maxaan sameeyaa haddii anan fahmin wax turjumaanku sheegay ama an rumaysnahay in turjumaanku wax khalday?

Haddii ad rumaysan tahay in turjumaanku wax khalday ama adan fahmin wax la sheegay intii maxkamaddu socotay, u sheeg Xubinta Guddoonka. Haddii goob joogayaashu ay rumaysan yihiin in turjumaanku wax khalday, waa in ay u sheegaan qareenkaaga marka la galo nasashada ama dhammaadka maxkamadda. Haddii turjumaanku khaldo turjumidda wax ad tiri, ku celi ereyadii hore ee ad tiri ama ku celi hadalkii adoo eraya kale isticmaalaya ilaa ad ku qanacdid turjumaadda. Haddii adan wali ku qanacsanayn turjumaadda, u sheeg Xubinta Guddoonka.

Ma soo kaxaysan karaa markhaatiyaal?

Haa. Markhaatiyaalkaagu waxay uga soo qaybgali karaan ayagoo yimaada, telefoon ama maqal iyo muuqaal. Waxaa lagaaga baahan yahay in ad qoraal ugu sheegtid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in ad markhaatiyaal u yeeraysid ugu yaraan 10 maalmood ka hor maxkamaddaada. Waa inaad u gudbisid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (iyo Qareenka Wasiirka , haddii u ka soo qaybgalayo) xogta halka lagala xiriirayo, sida markhaatiyadu ay kuu yaqaanaan (qoyskaaga, saaxiib, urur bulsho) sida caddayntoodu ay u khusayso dacwaddaada, in ay ku markhaati furayaan telefoon ama ay imaanayaan, iyo inta ad isleedahay in markhaati furkoodu qaadan doono. Haddii ad u yeeraysid "markhaati khabiir ah" waa in ad ayadana keento xogta ku saabsan shahaadooyinka markhaatiga. Markhaatiyada imaanaya waxay fariisanayaan qolka maxkamadda bannaankiisa ilaa la gaaro waqtigii ay hadli lahaayeen. Haddii markhaatigaagu u ku markhaati furayo telefoon waa in ad keentid kaar telefoon lagu waco.

Ma soo kaxaysan karaa saaxiibbo?

Haa. Haddii an lagu darin liiska markhaatiyada, looma ogolaan doono in ay ka hadlaan maxkamadda, xataa haddii ay xog ogaal u yihiin dacwaddaada. Waa in ay saxiixaan foom maalinta maxkamaddaada, aygoo caddaynaya in ay fahamsan yihiin in maxkamaddaadu sir tahay.

Waa maxay macnaha haddii la ii sheego in an ahay qof “an la ogolayn”?

Macnaheedu waxaa weeye in Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) ay rumaysan tahay in adan u qalmin magangalyo qaxootinimo, in kastoo ay dhici karto in ad khatar kaga jirtid waddankaagii. Tusaale ahaan, waxaan lagu ogolaan Karin haddii ad dambi xun ku soo gashay meel Kanada ka baxsan, ama haddii u jiro waddan kale oo ad ugu noolaan kartid si nabadgalya ah, kuna leedahay xuquuq la mid ah tan waddaniyiinta kale. Ogolaansho la’aantu aad bay halis u tahay. Badanaaba waa lagu sheegayaa haddii ogolaansho la’aantu tahay qodob ka mid ah dacwaddaada ka hor inta aysan bilaaban maxkamaddaadu. Haddii Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu ay kuu sheegto in ogolaansho la’aantu ay tahay qodob ka mid ah maxkamadda, waa in ad weydiisatid in maxkamadda dib laguugu dhigo (maxkamadda maalin kale laga dhigo) si ad u heshid waqti ad ku soo uruursatid caddaymo una soo diyaarsatid dood sharci ah oo ad ugu jawaabtid shakigooda.

Ma u baahnahay in an carruurtayda keeno maxkamadda?

Haddii ad leedahay carruur yaryar oo ku jirta dacwaddaada qaxootinimo, waxaad u baahan tahay in ad keentid maxkamaddaada si loo aqoonsado. Markii la aqoonsado ka dib, waxay u badan tahay in Xubinta Guddoonku u sheegto carruurtaada in ay qolka maxkamadda ka baxaan. Soo kaxayso qof carruurta kuu haya inta maxkamaddu ka dhammaanayso.

Maxaan soo labistaa (xirtaa)?

Maalinta maxkamaddaada, soo gasho dhar ad dareemaysid raaxo, dagganaansho iyo wax lala shirtagikaro (golejoojis). Dharkaagu waa inuu yahay nadiif, qurxoon yahay, kuna siiyo dareen kalsooni, isla markaana muujinaya in ad ogsoon tahay muhiimadda maalintaas.

Maxkamadda dacwaddayda ma la duubayaa?

Makrafoono yaalla qolka maxkamadda ayaa duubaya dacwaddaada. Haddii lagu siiyo go’aan diidmo ah, adna rumaysan tahay in Xubinta Guddoonku aysan fahmin caddaymaha, waxaad weydiisan kartaa Hay’adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB) nuqul wixii la duubay ah si ad u tustid wixii la yiri.

Maxaan sameeyaa haddii an xanaaqo ama oohin ka wareego?


Ha walwalin. Dad badan baa ooya markay ku jiraan maxkamadda dacwaddooda qaxootinimo. Inta maxkamadda lagu jiro mar kastoo ad dareentid xanaaq, waxaad qaadi kartaa tallaabooyin ad isku dajinaysid. Tusaale ahaan:

- si fiican neefta u qaado 3 ama 4 jeer
- weydiiso in biyo laguu keeno
- weydiiso nasasho kooban



Xusuusnow, tani waa maalintaadii. Samee wax kasta oo ad u baahan tahay in ad samaysid, si ad u dareentid sida ugu raaxa badan uguna daggan ee suurtagalka ah.

Liiska Qodobbada Diyaarinta Maxkamadda Dacwadda



Isticmaal liiska qodobbada soo socda si uu kaaga caawiyo in ad isu diyaarisid maxkamadda. Haddii ad qareen leedahay, qareenkaagu dib ha kuula eego liiska qodobbada.



- Waxaan la kulmay qareenkayga (haddii an qareen leeyahay) aadna waa ugu diyaarsanahay maalinta maxkamaddayda.
- Waxaan u turjumay Af Ingiriis ama Af Faransiis, waana u gudbiyey Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), dhammaan warqadahayga aqoonsiga iyo caddaymaha la xiriira (tusaale, caddaymo qoraal ah, caddaymo maqal iyo muuqaal ah, maqaallo, iwm.) ugu yaraan 10 maalmood maxkamaddayda ka hor.
- Haddii wax arrimo cusub ahi dhacaan ama caddaymo cusub an helay, xataa ayadoo ay maxkamaddaydii ka hartay 10 maalmood, qoraaladaas cusub waxaan u turjumay Af Ingiriis ama Af Faransiis waana gudbiyey.
- Haddii Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) ii soo dirtay farriimo cusub oo ay iiga codsanayso caddaymo dheeraad ah, waa gudbiyey.

- Waxaan dib u akhriyey Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC Form), anoo hubinayaa in waxa an ku qoray ay sax yihiin dhanna yihiin. Haddii an helay wax khaldan ama faahfaahin an ka tagay waan u sheegay Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) iyo qareenkayga, haddii an qareen leeyahay.
- Waxaan dib u eegay qeexidda sharciyada “Qaxootiga Caadiga ah” (“Convention Refugee”) iyo “Qofka U Baahan Magangalyada” (“Person in Need of Protection”) (eeg bogogga 20–21), iyo qodobada sharciga ugu muhiimsan dacwaddayda qaxootinimo (eeg bogogga 23–27).
- Waxaan diyaarsaday dhammaan qoraalada dacwaddayda qaxootinimo an u qaadan lahaa maxkamadda dacwaddayda [warqadihii aqoonsiga asalka ahaa, nuqulada caddaymaha asalka ahaa ee an gudbiyey, nuqul ah Foomka Xogta Dacwaddayda Qaxootinimo (BOC Form) iyo foomamka Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC forms), iyo nuqullo ah dhammaan warqadihii iyo qoraalladii an ka helay Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA), Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC), iyo Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)].
- Waxaan Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) siiyey magacyada iyo xogta halka lagala xiriiri karo markaatiyada ku marag furi doona qof ahaan ama telefoon ahaan ugu yaraan 10 maalmood ka hor maxkamaddayda (eeg bogga 34). Markhaatiyadayda waxaan u sheegay waxa ka dhici doona maxkamadda dacwaddayda qaxootinimo, iyo sababta caddaymahoodu muhiimka ugu yihiin dacwaddayda. Waxaan kaloo u sharraxay in Xubinta Guddoonku ay dhici karto in ay su'aalo weydiiso si ay u hubiso in caddaymahoodu yihiin kuwo la rumaysan karo, waafaqsanna xogta an bixiyey. Waxaan xaqiijiyey in markaatiyadaydu ogyihiin waqtiga, taariikhda, iyo goobta maxkamadda dacwaddayda.
- Waxaan ogahay in la ii ogol yahay in an maxkamaddayda keensado goobjooge (saaxiib, xubin qoyska ah, qof taageere ah) si ay ii taageeraan. Haddii an go'aasaday in an casumo goobjooge, waan ku wargaliyey waqtiga, taariikhda, iyo goobta maxkamaddayda.
- Waxaan carruurtaada u diyaariyey dad haya, haddii an carruur leeyahay. Waxaan ogahay in Xubinta Guddoonka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay tahay in ay aragto carruurtaada marka maxkamaddu bilaabmayso.
- Waxaan u diyaarsanahay maxkamadda dacwaddayda. Waxaan sharrixi karaa sababta an uga baqayo in an ku laabto waddankaygii, waxaan ku celceliyey in an su'aalaha uga jawaabo qareenkayga, xubin qoyskayga ah, ama saaxiibkay.



Maxaa dhacaya haddii an u baahdo in an baddalo taariikhda ama waqtiga maxkamaddayda xaalad deg deg ah awgeed?

Adiga ama qareenkaagu waa in uu:

- Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) qoraal ugu sheego ugu yaraan 3 maalmood ka hor maxkamaddaada
- Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) siiyo 3 taariikhood iyo waqti oo kale oo suurtagal ah oo ay maxkamaddaadu dhici karto, kuwaasoo ah 10 maalmood oo shaqo gudahood marka laga bilaabo taariikhda maxkamaddaadii hore.
- Gudbiyo warqad caafimaad oo dhakhtarkaagu soo qoray, haddii sababtu tahay caafimaad; haddii adan warqad caafimaad keeni karin, waa inaad gudbisid warqad sharraxaysa sababta adan u heli karin
- Haddii adan jawaab ka helin Hay'adda Socdaalka

iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) waa in ad tagtid maxkamadda taariikhdi hore ee lagu qabtay. Haddii adan tagin, waxaa lagaa rabaa in ad tagtid “maxkamad gaar ah” (“special hearing”) taariikhda ku qoran “Ogeysiiska Ballanta Maxkamadda Dacwadda” (“Notice to Appear for a Hearing”. “Maxkamaddaada gaarka ah,” waxaa dhici karta in dacwaddaada lagu go'aamiyo “mid laga noqday” (“abandoned”). Sidoo kale, haddii Qareenka Wasiirku [wakiil ka socda Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA)] ka soo qaybgalay maxkamaddaada, waa in ad u dirtid codsigaaga nuqul ah. Warqadda ad u diraysid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), waa in ad u sharraxdid sidii iyo goortii ad siisay nuqul Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA).

Maxkamadda Dacwaddaada Ka Dib



Go'aan Togan / Ogolaansho (Positive Decision):

Haddii ad heshid go'aan ogolaansho oo Wasiirkuna rafcaan ka qaadan 15 maalmood gudahood, sharci dagganaansho Kanada ayaad ka codsan kartaa Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada. Codsigaaga waxaad ku dari kartaa lamaanahaaga (xaaskaaga / ninkaaga) iyo carruurta xaqa u leh.

Kooxaha dadka qaarkood waxaa loo sheegi karaa in ay yihiin Waddaniyiin Shisheeye an Caadi Ahayn (Designated Foreign Nationals). Haddi ad tahay Waddani Shisheeye an Caadi ahayn, waxaad sugaysaa 5 sano oo ka horreysa inta ad codsan kartid sharci dagganaansho. Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) ama Wasaaradda Socdaalka iyo Waddanimada Kanada (CIC) ayaa kuu sheegeysa maxkamadda ka hor haddii ad tahay Waddani Shisheeye an Caadi Ahayn (DFN) (eeg bogga 40).

Kanada ha ka bixin adoon qareen la hadlin. Haddii ad u baahan tahay in ad Kanada ka baxdid waa in ad codsatid Warqadda Safarka Qaxootiga (Refugee Travel Document). Codsiga Warqadda Safarka Qaxootiga waxaa laga heli karaa: www.ppt.gc.ca. Riix "Foom Hel" ("Find a Form") ka bacdina dooro mid ka mid ah "Codsiyada Warqadda Safarka" ("Travel Document Applications").

Go'aan Taban / Diidmo (Negative Decision):

Haddii ad heshid go'aan diidmo, qareen kala hadal fursadaha kalee kuu furan:

- Waxaad dooran kartaa in ad iskaa Kanada iskaga baxdid, ama
- Haddii ad xaq u leedahay in ad rafcaan qaadatid, go'aanka waxaad rafcaan uga qaadan kartaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), ama
- Haddii adan xaq u lahayn rafcaan, waxaad ka codsan kartaa Maxkamadda Federaalka (Federal Court) Dib U Eegis Garsoor (Judicial Review) ee go'aanka.

Haddii ad go'aanka diidmada ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalinta Qaxootiga (IRB-RPD) Rafcaan uga qaadatid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD):

- Waxaad u baahan tahay in qareen ku caawiyo sababtoo ah waa qaab dhib badan waqti badanna u baahan. Haddii ad qareen weydid, la xiriir mid ka mid ah hay'adaha ku qorn bogga 44 si ay kuu caawiyaan.
- Waa in ad ka codsatid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD) 15 maalmood gudahood markaad heshid "Ogeysiiska Go'aanka" ("Notice of Decision"). Taa ka dib, waxaad haysataa 15 maalmood oo kale si ad u wanaajisid (dhammaysid) rafcaankaaga.
- Waxaa lagu ogol yahay in ad Kanada sii joogtid inta go'aan laga gaarayo rafcaankaaga Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD).
- Rafcaanada badankooda, maxkamadi ma dhacdo. Go'aanka rafcaanka waxaa lagu saleeyaa caddaymahaagii iyo doodahaagii ad qortay, waxaana laguugu soo dirayaa 90 maalmood gudahood.
- Haddii ay Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga diido rafcaankaaga,

waxaad ka codsan karta Maxkamadda Federaalka Dib U Eegis Garsoor. Waxaa lagu ogol yahay in ad sii joogtid Kanada inta go'aan kama dambays ah laga gaarayo codsigaagii Dib U Eegista Garsoorka.

Haddi adan xaq u lahayn in ad rafcaan u qaadatid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD), kana codsatid Maxkamadda Federaalka Dib U Eegis Garsoor go'aanka diidmo ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD):

- Waa in ad heshid qareen ku caawiya sababtoo ah waa qaab dhib badan waqti badana u baahan.
- Waa in ad ka codsatid Maxkamadda Federaalka 15 maalmood gudahood markaad heshid "Ogeysiiskaaga Go'aanka" ("Notice of Decision").
- Haddii ay kuugu yeerto Hay'adda Adeegyada Xudduuda Kanada (CBSA) in lagu dhoofiyo, waa in ad u sheegtid qareenkaaga isla markiiba. Waxaad ka codsan kartaa Maxkamadda Federaalka in lagaa joojiyo dhoofinta si ad u sii joogtid Kanada inta ad sugaysid go'aanka Dib U Eegista Garsoorka.

Cinwaanada Maxkamadda Federaalka, gal:

http://cas-nrc-nter03.cas-satj.gc.ca/portal/page/portal/CAS/locations_eng

Wixii macluumaad dheeri ah ee rafcaanada Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD) gal: www.irb-cisr.gc.ca/Eng/RefApp/Pages/RefApp.aspx



Xaq ma u leeyahay in an rafcaan u qaato Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD)?

Aad bay muhiim u tahay in ad qareen la hadashid si loo ogaado in ad xaq u leedahay in ad rafcaan ugu qaato Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD) go'aanka diidmo ee Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Haddii adan haysan qareen, isku day in ad talo ka heshid qareen ama arday sharciga barta oo ad ka heli kartid mid ka mid ah rugaha la talinta sharciga lacag la'aanta ah oo ku qoran bogga 44 ee Buughagahaan.

Dadka qaxootinimada u dacwoonaya qaarkood, sida kuwa ah Waddaniyiin Shisheeya An Caadi Ahayn, iyo kuwa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) ay sheegtay in ay wataan dacwado "sida muuqata an waxba ka jirin" ama dacwado "an ku salaysnayn wax la rumaysan karo" xaq uma laha in ay rafcaan u qaataan Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD).



Waa maxay farqiga u dhexeeya rafcaan iyo Dib U Eegis Garsoor?

Dhanka rafcaanka, waxaa go'aanka gaara xubin ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD) waxayna xubintaas go'aan cusub ka gaari kartaa dacwaddaadii. Dhanka Dib U Eegista Garsoorka, waxaa go'aanka gaara Garsoore Maxkamadda Federaalka, kaasoo go'aamin kara oo kaliya in Xubinta Guddoonka maxkamaddaadu samaysay khalad sharci markay go'aanka qaadanaysay. Haddii garsooruhu go'aansado in khalad jiray, dacwaddaada waxaa dib loogu celinayaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD) in maxkamad cusub la qaado.

Haddii ad xaq u leedahay in ad rafcaan u qaadato Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Rafcaanka Qaxootiga (IRB-RAD), waa in ad dhammaysid rafcaankaaga ka hor inta adan codsan Dib U Eegis Garsoor.

Qeexidda Ereyada / Weeraha Sharciga

Dacwad laga noqday (Abandoned claim):

Haddii ad gaftid maalinta ugu dambaysa Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC) ama maxkamaddaada, waxaa dhici karta in Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) ku dhuwaaqdo in dacwaddaadu tahay mid “laga noqday” (“abandoned”). Taasoo macnaheedu yahay in an laguu ogolaan doonin in ad sii waddid dacwaddaada ama mar kale dacwad furtid mustaqbalka. Haddii dacwaddaada lagu dhawaaqay in ay tahay mid “laga noqday” waxaad codsan kartaa in dacwadda dib laguugu furo, haseyeeshee codsigaasu waa mid aad u adag in lagu guulaysto.

Waddan Ammaana [Designated Country of Origin (DCO)]:

Waa waddan ku jira liiska “waddamada ammaankaa” ee Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) (waddamada ay Dawladda Kanada xaqiijisay in aysan badanaaba soo saarin qaxooti, haseyeeshee dhawra xuquuqda aadanaha, sugana nabadgalyada dalka). Tusaale ahaan: Maraykanka iyo waddamada Yurub badankooda. Qaxootiga ka yimaadaa Waddamada Ammaankaa (DCO) waxay leeyihiin shuruuc gaar ah oo khuseysa nadaamka dacwaddooda. Liiskii ugu dambeeyey ee Waddamada Ammaankaa, booqo bogga internetka www.cic.gc.ca [raadi “Waddamada Ammaankaa” (“DCO”)]. Dadka ka yimaada Waddamada Ammaankaa waxay wajahayaan ballamo maxkamado la dadajiyey marka la qaabilayo dacwaddooda qaxootinimo.

Waddani Shisheeye An Caadi Ahayn (DFN):

Waa qof Kanada yimid asagoo la socda koox dad ah, oo Dawladda Kanada u aqoonsato “yimaade an caadi ahayn” (“irregular arrival”). Yimaadayaalka An Caadiga Ahayn waxay leeyihiin sharcio gaar ah oo lagu dhaqo nadaamka dacwaddooda iyo hayntooda (xiriddooda).

Wakiilka Danaha Qofka (Designated Representative):

Waa qof ay u dooratay Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) in uu masuul ka noqdo ilaalinta danaha qofka carruurta ah oo ka yar 18 sano ama qofka weyn oo an kaligiis fahmayn nadaamka qaxootiga. Qofkaasu badanaaba waa qof waalid ah, haseyeeshee wuxuu noqon karaa xubin kale oo qoyska ka mid ah, saaxiib ama shaqaale hay'adda adeegyada bulshada.

Qof la reebay (Excluded person):

Waa qof an loo aqoonsan karin “Qaxooti Caadiya” (“Convention Refugee”) ama “Qof La Magangaliyey” (“Protected Person”).

Tusaale ahaan:

- Qof dambi culus ku soo galay Kanada meel ka baxsan
- Qof xuquuq waddaninimo ama sharci dagganaansho ku leh waddan kaloo nabadgelyo ah

Habka dacwadda la dadajiyey (Expedited Process):

Dacwadda qaxootiga waa la dadajiyaa marka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu ay u aragto in dacwadda go'aan laga gaari karo ayadoon qofka qaxootiga u dacwoonayaa tagin maxkamad. Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga ayaa kugu wargalin doonta haddii ad u qalantid habkaan deg degga ah. Booqo www.kinbrace.ca/rhp-guide/updates si ad u fahamtid dadka u qalma habkaan iyo goorta ay u qalmaan.

Waxyello / Cadaadis (Persecution):

Guud ahaan, cadaadis waxaa loola jeedaa waxyello culus oo khatar ku ah ama ku xadgudubta xuquuqda aadanaha ahna mid soo noqnoqota ama joogta ah. Qeexidda sharciga ereygu waa adag tahay, waxaana lagugula talinayaa in ad qareen kala tashatid famahka sida qeexidda ereygu u khuseeyo dacwaddaada. Jirdil, garaacid, hanjabaado dil, khasab dhufaanid, khasab guudid dumar, guur khasab ah, xabsi galin sabab dhaqdhaqaaqyo siyaasadeed oo an rabshado lahayn, iyo kufsi ayaa ka mid ah tusaalayaasha ereyga cadaadis / waxyello (persecution).

Maxkamad gaar ah (Special hearing):

Waa maxkamad lagu go'aaminayo in dacwaddaada qaxootinimo lagu dhawaaqo in ay tahay mid "laga noqday" ("abandoned"). Waa in ad hor tagtid "maxkamad gaar ah" haddii ad gaftid maalinta ugu dambaysa ee gudbinta Foomka Xogta Dacwaddaada Qaxootinimo (BOC Form) ama haddii adan tagin maxkamadda dacwaddaada qaxootinimo. Taariikhaha "maxkamadahaaga gaarka ah" waxay ku qoran yihiin "Ogeysiiska Ballanta Maxkamadda Dacwadda" ("Notice to Appear for a Hearing") lagu siiyey bilowgii dacwaddaada qaxootinimo.

Qof nugul / jilicsan (Vulnerable person):

Qofka nugul ama jilicsan waa qof, sabab gaar ah awgeed, ay dhib ku tahay maxkamad caadi ah una baahan in wax laga baddalo qaabka maxkamadda. Waxay u nuglaan karaan sabab jirro, da', ama soo maray dhacdooyin naxdin iyo murugo badan oo ay ku adag tahay in ay sharraxaan wixii ku dhacay. Wax ka baddal noocee ah ayaad codsan kartaa? Tusaale ahaan, haddii ad ogtahay in ad ku hafanaysid oo wareeraysid, waxaad codsan kartaa nasiinooyin badan. Haddii ad tahay qof dumar ah oo soo martay faraxumayn galmo, ama dhibaatooyin kale oo ay adag tahay in ad u sharraxdid qof rag ah, waxaad codsan kartaa Xubinta Guddoonka iyo turjumaanka in ay noqdaan dumar. Haddii ay ku soo jaahwareeriyeen dhacdooyin hore, waxaad codsan kartaa Xubin Guddoon oo dareen gaar ah u leh waxyeeelooyinka musiibada.

Haddii ad tahay qof nugul, adiga ama qareenkaagu waa in uu isla markiiba u sheegaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD). Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga u sheeg wax ka baddalka nadaamka maxkamadda kuu sahlaya in ad soo bandhigtid dacwaddaada. Mararka qaarkood, waxaa waxtar leh in ad codsigaaga ku xoojisid warqad dhakhtar kuu soo qoray. Haddii ay Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootigu (IRB-RPD) go'aansato in ad tahay qof nugul, waxay kuu samaynayaan qorsheyaal gaar ah oo ay kuugu fududaynayaan in ad wax ku caddaysid.

Hay'adaha Dawladda



Saddex hay'adood oo dawladdaa ayaa kaalin ama lug ku leh nadaamka dacwadda qaxootiga: Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC), iyo Hay'adda Adeegyada Xuudduuda Kanada (CBSA). *Haddii ad baddashid cinwaankaaga ama nambarka telefoonka, waa in ad **hay'ad walba ula xiriirtid gaar ahaanteeda**, siisidna macluumaadkaaga cusub.* Marka ad warqad u qoraysid Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD), ku qor magacaaga iyo Nambarka Galka Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada (IRB File Number) ama Nambarka Aqoonsiga Macmiilka Gaarka ah [Client ID (UCI)]. Markaad warqad u qoraysid Wasaaradda Socdaalka iyo Waddananimada Kanada (CIC) ama Hay'adda Adeegyada Xuudduuda Kanada (CBSA), ku qor magacaaga iyo Nambarka Aqoonsiga Macmiilka Gaarka ah (Client ID ama UCI). Nambarka Aqoonsiga Macmiilka, ama Nambarka Aqoonsiga Macmiilka Gaarka ah (Client ID ama UCI) waa nambarka siddeeda nambor ka kooban oo ku qoran Caddayntaada U Dacwoodaha Magangalyo Qaxooti (Refugee Protection Claimant Document).



Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)

Kaalinta ay ku leedahay habka dacwaddaada:

- Waxay dib u eegtaa Foomka Xogta Dacwaddaada (BOC Form)
- Waxay fulisaa maxkamaddaada qaxootinimo
- Waxay go'aamisaa in dacwaddaada qaxootinimo la ogolaaday ama la diiday
- Waxay bixisaa hanuuninta nadaamka maxkamadda qaxootiga ayadoo u maraysa barnaamijka Booqashada DIYAARINTA (READY Tour)

Halka lagala xiriiro:

Immigration and Refugee Board of Canada
Refugee Protection Division
300 West Georgia Street, Suite 1600
Vancouver, BC V6B 6C9

Saacadaha Shaqada: 8:00 am – 4:00 pm, Isniin ilaa Jimce

Telefoon: 604-666-5946 ama 1-866-787-7472
Fakis: 604-666-3043

Bogga Internetka: www.irb-cisr.gc.ca

Wasaaradda Socdaalka iyo Waddaninimada Kanada (CIC)

Kaalinta ay ku leedahay habka dacwaddaada:

- Waxay qabataa codsigaaga si ad u bilawdid dacwadda qaxootinimo (Kanada gudaheeda) waxayna go'aamisaa in ad u qalantid in ad dacwootid
- Haddii ad u qalantid, waxay xogta dacwaddaada u gudbisaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)
- Waxay mucaaradi kartaa dacwaddaada ayadoo caddaymo qoraal ah u diraysa ama wakiil, loo yaqaan Qareenka Wasiirka, kaa soo horjeeda maxkamaddaada

Waajibaad dheeraad ah:

- Waxay bixisaa warqadaha shaqada iyo Caymiska Caafimaadka Federaalka Ku Meel Gaarka ah

Halka lagala xiriiro:

Citizenship and Immigration Canada
9700 Jasper Avenue, Suite 240 Canada Place
Edmonton, AB T5J 4C3

Saacadaha shaqada: 8:00 am – 4 pm, Isniin ilaa Jimce

Xarunta Wicidda (CIC Call Centre): 1-888-242-2100

Bogga Internetka: www.cic.gc.ca

Hay'adda Adeegyada Xuuduuda Kanada (CBSA)

Kaalinta ay ku leedahay habka dacwaddaada:

- Waxay qabataa codsigaaga si ad u bilawdid dacwadda qaxootinimo Halka ad Kasoo Gashay (xuuduud, dakad, ama garoon dayuuradeed) waxayna go'aamisaa in ad u qalantid in ad dacwootid
- Haddii ad u qalantid, waxay xogta dacwaddaada qaxootinimo u gudbisaa Hay'adda Socdaalka iyo Qaxootiga Kanada – Qaybta Magangalyada Qaxootiga (IRB-RPD)
- Waxay mucaaradi kartaa dacwaddaada ayadoo caddaymo qoraal ah u diraysa ama wakiil, loo yaqaan Qareenka Wasiirka, kaa soo horjeeda maxkamaddaada

Waajibaad dheeraad ah:

- Waxay ilaalisaa xuuduudaha Kanada, waxayna go'aamisaa cidda soo galaysa Kanada iyo cidda ay tahay in ay baxdo
- Waxay diyaarisaa in Kanada lagaa dhoofiyo, haddii lagu siiyo go'aan diidmo dacwaddaada qaxootinimo
- Waxay awood u leedahay in ay ku xirto haddii ay xaqiijin waayaan aqoonsigaaga, haddii ay rumaysan yihiin in ad khatar galin kartid bulshada Kanada, ama haddii ay rumaysan yihiin in adan u hoggaansami doonin sharci ka mid ah Xeerarka Socdaalka Kanada. (Haddii lagu xiro, waxaad xaq u leedahay qareen maxkamadna waa lagu saarin looga doodayo sii dayntaada).

Halka lagala xiriiro:

Canada Border Services Agency
10345-104 Street NW
Edmonton, AB T5J 1B9

Saacadaha shaqada: 8:00 am – 4 pm, Isniin ilaa Jimce

Telefoon: 1-800-461-9999

Bogga Internetka: www.cbsa-asfc.gc.ca

Macluumaad (Resources)

Sharciga:

Caawimaadda Sharciga Alberta (Legal Aid Alberta)

Revillon Building
10320 102 Avenue, Suite 300
1-866-845-3425
www.legalaid.ab.ca

Waxay dadka qaxootigaa ee xaqa u leh siisaa macluumaad sharci, la talin iyo u qareemid.

Barnaamijka Caawimaadda Qaxootiga ee Jaamacadda Ottawa

ccrweb.ca/en/uorap
Waxay dadka qaxootigaa siisaa taageero dhanka soo ururinta caddaymaha lagu xoojiyo dacwadda.

Xarunta Sharciga Beesha Edmonton

10115 100A Street, Suite 200
780-702-1725
www.eclc.ca
Waxay dadka qaxootigaa ee u qalma siisaa macluumaad sharci iyo la talin lacag la'aan ah.

Hay'adaha Beesha (Community Agencies):

Ururka Adeegyada Soogalootiga Edmonton (Edmonton Immigrant Services Association)

10720 113 Street, Suite 201
780-474-8445
www.eisa-edmonton.org
Waxay dadka qaxootigaa siisaa adeegyada dajinta asaasigaa, turjumaad, wacyigalin nadaamka dacwadda qaxootiga, macluumaad iyo meela kale u dirid.

Xarunta Menonaytka Edmonton ee Dadka Cusub (Edmonton Mennonite Centre for Newcomers)

11713 82 Street
780-424-7709
www.emcn.ab.ca
Waxay dadka qaxootigaa siisaa adeegyada dajinta asaasigaa iyo meela kale u dirid.

Wax Qabadka Beelaha Caafimaadka Qaba (Action for Healthy Communities)

10554 110 Street, Suite 101
780-944-4687 furaha 222
www.a4hc.ca
Waxay dadka qaxootigaa siisaa adeegyo dajin, macluumaad iyo meela kale u dirid.

Hay'adda Adeegyada Bulshada Katooligga (Catholic Social Services)

10709 105 Street
780-424-3545
www.catholicsocialservices.ab.ca
Waxay dadka qaxootigaa siisaa macluumaad dhanka dajinta asaasigaa, oo ay ku jirto u diridda hay'adaha kale ee beesha.

Kooxda dajinta iyo Adeegyada Deg deggaa ee Beesha (Community Urgent Services and Stabilization Team)

780-342-7777
www.albertahealthservices.ca/services.asp?pid=service&rid=4903
Waxay dadka maskaxda looga jiro siisaa adeegyo deg deg ah oo 24-ka saac ah.



Fadlan booq bogga interneka www.kinbrace.ca si ad uga akhrisatid Buughagahaan (Edmonton, Alberta) af:

- Ingiriis
- Faransiis
- Isbaanish
- Soomaali
- Tigree

Waxaan ku mahadinaynaa deeqsinimada hay'adaha mashruuca qaybta ka qaatay:

Alberta **LAW**
FOUNDATION



Waxaan kaloo u mahad naqaynaa khubarada badan (qaxooti, qareenno, adeeg bixiyaal, iyo kuwa kale) oo sida firfircoonida iyo garashada leh u galiyey waqtiga, ka falcelinta, iyo hal abuurnimada si ay u horumariyaan una sii wanaajiyaan Buughagaha Diyaarinta Maxkamadda Qaxootiga, mahadsanidin.



Kinbrace waxay soo dhawaysaa dadka qaxootinimada u dacwoonaya ayadoo siinaysa guryo, hanuunin, wehel, iyo waxbarasho. Shaqadayadu waxay ku salaysan tahay xiriirin iyo soodhaweyn.

Xuquuqda 2015 **Kinbrace Community Society**

Masuuliyad iska wareejin: Dhammaan macluumaadka ku qoran buughagahaan sax bay ahaayeen markii la daabacay. Haseyeeshee, masuul kama nihin wixii macluumaad isbaddal ku yimaado waqtigaas dabadeed.

Masawirada: Andrea Armstrong